

TILMAANTA ADEEGYADA LUMISTA MAQALKA

*ee Qoysaska Leh Ilmo Qaba
Lumis Maqal*



Mashruucan waxa qayb ahaan taageeray Project #H61 MC 00084 ee Maternal and Child Health Bureau (Title V, Social Security Act), Health Resources and Services Administration, Department of Health and Human Services.

TUSMADA QORAALKA

1. Hordhac	1
2. Ilmahaagu waxa uu qabaa lumis maqal	2
2.1 Dareenka ku saabsan lumista maqalka ee ilmahaaga.....	2
2.2 Sidee baan ku habsan karaa in cilad-sheegiddu sax tahay?.....	3
2.3 Maxaa aannu maanta qabanaa?.....	3
2.4 Ilmahaygu ma u baahan yahay qalabka gargaarka maqalka?.....	5
2.5 Ilmahaygu ma awoodi doonaa in uu hadlo?.....	6
2.6 Waa maxay wax-ka-qabashada goor hore?.....	6
3. Aya gargaar bixin kara?	8
4. Maqalka ilmahaaga	13
4.1 Sidee bay dhegtu u shaqeysaa?.....	13
4.2 Sidee baa loo baadhaa maqalka ilmahayga?.....	15
4.3 Ku saabsan lumista maqalka.....	19
4.4 Cabirka maqalka (audiogram) ee ilmahaaga.....	24
4.5 Su'aalaha inta badan la iska weydiiyo lumista maqalka.....	28
5. Sidee baa ilmahaygu isgaadhsiin u sameyn doonaa?	30
5.1 Sida lumista maqalku u saameyso isgaadhsiinta?.....	30
5.2 Ilmahayga iyo qoyskaygu ma baran doonaan luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah?.....	31
5.3 Doorashada hab isgaadhsiin.....	31
5.4 Habab isgaadhsiin.....	33
6. Qalabka gargaarka maqalka iyo cod-weyneysiinta (amplification)	36
6.1 Qalabka gargaarka maqalka.....	36
6.2 Qalabka lagu rakibo gudaha dhegta (cochlear implants), hababka FM iyo qalabka dhegaysiga ee gargaarka leh ee kale.....	44

7. Xuquuqda ilmahaaga iyo xuquuqdaada waalid ahaan	47
7.1 Sharciga iyo xuquuqdaada.....	47
7.2 Waajibaadkaaga waalid ahaan.....	49
7.3 Sheekada Olivia	51
8. Adeegyo	54
8.1 La-xidhiidhista Isu-duwahaaga Adeegga Qoyska (Family Resource Coordinator).....	54
8.2 Barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore ee ku takhasusay lumista maqalka.....	55
8.3 Dugsiga ilmaha qaba lumis maqal.....	58
8.4 Rugaha internetka.....	60
8.5 Maqal-yaqaanada (audiologists) qiimeeya ee daryeela ilmaha yaryar iyo caruurta qaba lumis maqal.....	66

HORDHAC

Waxa laga yaabaa inaad imminka uun ogaatay in ilmahaagu qabo lumis maqal. Mudada ka dambeysa sheegidda ciladda lumis maqal waxay waalidka ku noqon kartaa mudo u leh walaac badan. Waa inaad maskaxda ku haysid marka ilmo kastaa soo korayo waxay taasi qoyska siinaysaa fursado iyo imtixaanid cusub. Marka dhinacaa laga eego, ilmaha qaba lumis maqal kama duwana ilmaha kale. Wax badan ayaa la qaban karaa si ilmahaaga looga gargaaro inuu isgaadhsiin sameeyo oo uu guuleysto. Fahmida lumista maqalka ee ilmahaaga iyo ikhtiyaarada ama doorashooyinka la heli karo waxa aad ka heli doontaa gargaar weyn inta ilmahaagu korayo.

Waxa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo badan. Tilmaan-bixintan waxa loo qorsheeyay inuu kaa gargaaro fahmida lumista maqalka ilmahaaga, oo aad bilawdid sidii aad u indho-indheyn lahayd adeegyada loo heli karo ilmahaaga iyo qoyskaaga.

Waxay noqon doontaa inaad gaadhid go'aamo badan oo ku saabsan ilmahaaga. Ma jiro hal doorasho oo la odhan karo waa ku "sax" qof kasta. Waxa aad u baahan doontaa inaad go'aan ka gaadhid waxa sida ugu fiican ugu shaqeynaya qoyskaaga iyo waxa uu go'aanka "saxda" ahi u yahay qoyskaaga. Hadba marka ilmahaagu sii koro, waxa is beddeli doona baahiyahaaga. Waxa laga yaabaa inaad go'aan ku gaadhid inaad doorashooyin kale sameysid wakhtiyo dambe. Waa inaad isa siisid wakhti aad ku baratid dhamaan ikhtiyaarada kuu banaan.

Waxa laga yaabaa in qaar ka mid ah warka ku jira tilmaan-bixiyahan ay imminka faa'iido kuu yeeshaan, qaar ka mid ahina goor dambe ayay faa'iido kuu yeelan karaan. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan mawduucyada lagaga hadlay tilmaan-bixiyahan, fadlan weydii maqal-yaqaankaaga ama dhakhtarkaaga.

ILMAHAAGU WAXA UU QABAA

LUMIS MAQAL

Dareenka ku Saabsan Lumista Maqalka ee Ilmahaaga

Marka waalidka qaarkood maqlaan in ilmahoodu qabo lumis maqal waxay taasi xaqiijisaa wixii ay hore u tuhunsanaayeen. Waalid badan ayaa marka maqal-yaqaanku u sheego in "ilmahoodu qabo lumis maqal" ay taasi ku noqotaa fajac. Waalidka qaarkood si fudud ayay u aqbalaan cilad-sheegista ah in ilmahoodu qabo lumis maqal. Waalidka qaarkoodna waxa dhib ku noqda inay aqbalaan arrintaa, waxayna ay xaaladda ku sii jiraan mudo dheer. Si kasta oo dareenkaagu noqdo waa inaad ogaatid in taasi tahay wax caadi ah. Ma jirto si sax ah ama khalad ah oo arrintan dareen looga bixiyo. Qoysaska intooda badani ma laha ama hore uma ay soo yeelan wax waayo-aragnimo ah oo ku saabsan lumista maqalka.

Marka aad la qabsatid xaqiiqada in ilmahaagu qabo lumis maqal, waxa aad ogaan doontaa inay jiraan go'aamo badan oo ay tahay in aad gaadhid. Waxa laga yaabaa inaad u baahatid inaad gaadhid go'aamo muhiim ah adiga oo wali niyad-kacsan. Waxa laga yaabaa inaad dawakhsan tahay ama aanad hubin waxa ugu fiican ilmahaaga.

Ogow in go'aamada ay waalidku gaadhaan ay ku saleysan yihiin warka ay wakhtigaa hayaan. Qasab ma ah in go'aamada intooda badan isla markiiba la gaadho. Waxa jira takhasusleyaal badan oo waayo-aragnimo u leh la-shaqeynta qoysas la mid ah qoyskaaga. Waxay kaa gargaari karaan sidii aad wax uga qaban lahayn walaacyada imminka iyo kuwa mustaqbalka. Ugu dambeyn, waxa aad u baahan tahay inaad go'aan ka gaadhid waxa sida ugu fiican ugu shaqeynaya ilmahaaga iyo qoyskaaga, waana inaad diyaar u noqotid inaad gaadhid go'aamo ama aad beddeshid go'aamadaada hadba marka ilmahaagu sii koro oo ay is beddelaan baahiyaha ilmahaagu.

Sidee Baan ku Hubsan Karaa in Cilad-sheegiddu Sax Tahay?

Sababta oo ah baadhista maqalka ee ilmaha dhawaan-dhaladka ah, waxa fiican in wakhtigan ilmaha laga baadho oo haddii ay qabaan laga helo lumis maqal iyaga oo da'doodu si weyn u yar tahay. Lumista maqalka badanaa lagama fahmi karo ilmaha da'doodu yar tahay, waxana ay taasi tahay arrin ay ku wareeraan waalidku. Waxa laga yaabaa inay jiraan saaxiibo ama xubno qoyska ka tirsan oo ku weydiiya in ilmahaagu dhabtii qabo lumis maqal iyo in kale. Xiitaa waxa laga yaabaa inay isku dayaan xoogaa ah "baadhitaan maqal oo guriga ah" si ay u xaqiijiyaan in ilmahaagu wax maqlayo. Si weyn bay u adag tahay in si fiican loo garto inta uu leeg yahay maqalka ilmaha yar marka la isticmaalo kaliya fiirin. Marka uu sidaa u da' yar yahay, ilmahaagu kuuma sheegi karo waxa uu si fiican u maqlayo iyo waxa aanuu maqlaynin. Way fiicnaan lahayd haddii uu kari karo inuu kuu sheego!

Baadhista maqalka ee lagu isticmaalo garashada ciladda lumis maqal waa baadhis si weyn sax u ah marka uu qabto maqal-yaqaan ilmo oo khibrad leh. Waxa kale oo ilmahaaga laga qaadi doonaa baadhiso maqal oo dheeraad ah mustaqbalka. Baadhisyadaasi waxay bixin doonaan war dheeraad ah oo ku saabsan lumista maqalka ee ilmahaaga. Haddii aad ka walwalsan tahay in ilmahaaga loo sameeyay qiimeyn maqal oo sax ah ama dhameystiran, akhri qaybta 4 ee tilmaan-bixiyahan. Waxay kaa gargaari doontaa inaad qiimeysid baadhista loo sameeyay ilmahaaga.

Dhamaadka qaybta 8 ee tilmaan-bixiyahan waxa aad ku arki doontaa liiska maqal-yaqaanada ilmaha ee ku takhasusay baadhista iyo daryeelista ilmaha yaryar ee qaba lumis maqal. Dhamaan maqal-yaqaanada ku yaala liiskaa waxay sheegeen inay ka soo baxeen Qodobada Dhaqanka Ugu Wacan ee Cillad-sheegista Maqalka ee Ilmaha Dhawaan-dhaladka ah ee Gobolka Washington (Washington State Best Practice Guidelines for Diagnostic Audiologic Follow-up to Newborn Hearing Screening).

Maxaa aannu Maanta Qabanaa?

Dhawrka todobaad iyo bilood ee ugu horeeya ka dib marka aad ogaatid in ilmahaagu qabo lumis maqal waxay noqon karaan wakhti aad mashquul tahay oo dhib leh. Halkan waxa ku yaala dhawr fikradood oo ku gargaari kara:

LA FALGAL OO ISGAADHSIIN LA YEELO ILMAHAAGA.

Waalidka qaarkood waxay dareemaan in la hadalka ilmahoodu ula muuqdo “si kale” sababta oo ah ma hubaan inta uu leeg yahay maqalka ilmahoodu. Looma baahna inaad sii daahisid bilaabista isgaadhsiinta. Sida aad caadi ahaan u sameyn lahayd isgaadhsiin ula samee ilmahaaga.

- Isticmaal cod caadi ah.
- Ilmuhu waxay ka jawaabaan qaabka codka ee gaarka ah iyo muuqaalka wajiga ee aynu iyagu ugu talogalno.
- Eegmo indhaha ah oo badan, taabasho, hab-siin iyo dhunkasho ayaa ilmaha ka gargaara inay bartaan sida dareen-celin loo sameeyo.
- U-sheekaynta ah fool-ka-fool waxay u fiican tahay dhamaan ilmaha, waliba gaar ahaan ilmaha qaba lumis maqal.
- Ilmahaagu waxa uu u baahan yahay inuu daawado afkaaga o dhaqdhaqaaq sameynaya, oo uu daawado dareen-muujinta wajigaaga.
- U hubso inaad u dhowdahay oo fool-ka-fool ugu aadan tahay ilmahaaga marka aad isgaadhiin la yeelaynaysid.

Ilmuhu waxay wax ka bartaan hawlo maalmeedkaaga iyo waxyaabaha aad qabatid ee aad tidhaahdid maalin kasta. Ilmahaagu waxa uu ka faa’iideysan doonaa isgaadhsiinta aad la yeelatid marka aad qabanaysid hawlaha sida beddelista xafaayadda ama dheebarka, qubeyska aad u sameysid, iyo quudin aad u sameysid. Waxa kale oo ilmahaagu wax ka baran doonaa marka aad u heestid heeso, aad u sameysid ciyaaro ah faraha, oo aad la ciyaartid ciyaaraha sida waji-qarqariska.

TAAGEERO KA RAADSO QOYSKA IYO SAAXIIBADA.

Dadka kuu dhow waxay kuu noqon karaan taageero weyn. Saaxiibada iyo xubnaha qoyskaagu waxay kula wadaagi karaan dareemadaada iyo ra’yigaaga ku saabsan waxa ugu fiican ilmahaaga. Waxa kale oo laga yaabaa inay fikrado kuwaaga ka duwan leeyihiin. Ku martiqaad dadka kaa taageerada nolosha ilmahaaga inay kaala qaybgalaan booqashooyinka aad ugu tagaysid maqal-yaqaanka, booqashooyinka wax-ka-qabashada goor hore, iyo shirarka kooxaha waalidka.

U SAMEYSO BUUG QORAAL-MAALMEED IYO XUSUUS-QOR ILMAHAAGA.

Buug qoraal-maalmeed waa buug aad ku qori kartid waxyaabaha muhiimka ah ee ku saabsan ilmahaaga.

- Qor dhawaaqyada ilmahaagu ka jawaab-celiyo ama dhawaaqyada cusub ee uu sameeyo. Marka ilmahaagu isbeddel sameeyo ee uu koro, waxa aad awoodi doontaa inaad aragtid inta uu horumaray!
- Qoro su'aalaha aad weydiin doontid xirfadleyda marka aad la kulantid.
- Qor dareemada iyo waayaha ku soo mara.
- Xusuus-qor ah sida kan lagu sheegay tilmaan-bixiyahan waa meel fiican oo aad ku kaydsan kartid nuqulada ama koobiyada warbixinnada baadhitaanada iyo waraaqaha muhiimka ah ee ku saabsan ilmahaaga. Marka aad tagtid ballamaha, waxa kuu fududaan doonaa inaad dadka kale tustid natiijooyinka ama inay ka sameysataan koobiyo haddii loo baahdo.

BILAW INAAD WAX KA BARATID IKHTIYAARADA ISGAADHSIINTA EE LOO HELI KARO ILMAHAAGA.

Waxa jira habab isgaadhsiin oo kala duwan oo loo heli karo ilmaha qaba lumis maqal iyo qoysaskooda. Qaybta 5 ee tilmaan-bixiyahan ayaa ku siin doonta hordhac ku saabsan ikhtiyaarada ama kala-doorashooyinka la heli karo.

LA XIDHIIDH ISU-DUWAHA ADEEGYADA QOYSKA EE MADAXA AH (FAMILY RESOURCES COORDINATOR) (FRC), ISU-DUWAHA CARUURTA LEH BAAHIYO CAAFIMAAD OO GAAR AH (CHILDREN WITH SPECIAL HEALTH CARE NEEDS) (CSHCN) EE DEGMADAADA.

Qofkaasi waxa uu kaa gargaari karaa inaad lacag u heshid qalabka gargaarka maqalka iyo adeegyo kale. War ku saabsan sida loola xidhiidho isu-duwaha FRC ama CSHCH waxa laga heli karaa qaybta 8 ee tilmaan-bixiyahan.

Ilmahaygu ma u Baahan Yahay Qalabka Gargaarka Maqalka?

Lumista maqalku waxay si weyn u yareysaa qadarka sandhaqa ee soo gaadhaya dhegaha iyo maskaxda ilmahaaga. Haddii ilmahaagu aanuu awoodin inuu maqlo hadalka, waxa markaa dhib ku noqon doona barashada hadalka lagu hadlo.

- Ilmaha yar da'da kasta ayaa loo rakibi karaa qalab gargaar maqal.
- Haddii habka isgaadhsiin ee aad dooratid uu sheegayo in ilmahaagu xidho qalabka gargaarka maqalka, qalabkaa gargaarka maqalka oo dhakhso aad ugu heshid ilmahaaga waxay soo hormarin doontaa in ilmahaagu maqlo codadka hadalka ee muhiimka ah.
- Waxa laga yaabaa in waalidka qaarkood doortaan hab isgaadhsiin oo la adeegsanayo kaliya luqada dhegoolaha ee calaamadaha ah, kaasoo aan u baahnayn isticmaalka qalabka gargaarka maqalka.

Ilmahaygu ma Awoodi Doonaa in uu Hadlo?

Tani waa su'aal adag in laga jawaabo. Waxay ku xidhnaan kartaa darnaanta lumista maqalka ilmahaaga, sida uu ilmahaagu u awoodo inuu isticmaalo inta uga hadhsan maqalka, iyo qodob kale.

- Caruurta qabta lumis maqal oo sii daran waxa dhib ku sii noqon doona barashada hadalka. Waxa dhici karta inay u baahan yihiin inay isticmaalaan xoogaa ah luqada dhegoolaha ee ah calaamadaha, iyo waliba qalabka gargaarka maqalka iyo la-tacaalista hadalka (speech therapy), si looga gargaaro inay isgaadhsiin sameeyaan.
- Caruur badan oo qaba lumis maqal oo khafiif ama dhexdhexaad ah ayaa barta inay si fiican u hadlaan marka ay gargaar ka helaan qalabka gargaarka maqalka iyo la-tacaalista hadalka.

Waa Maxay Wax-ka-qabashada Goor Hore?

Barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore (Early Intervention) waxa loogu talagalay caruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da saddex sannadood iyo qoysaskooda. Barnaamijyadaasi waxa bixiya takhasusleyaal tababar u leh caruurta yaryar ee qaba lumis maqal.

- Marka aad is qortid barnaamij Wax-ka-qabasho Goor Hore, waxa lagugu qori doonaa takhasusle ilmo oo la shaqeyn doonaa adiga iyo ilmahaaga.
- Waxa kale oo aad ikhtiyaar u leedahay inaad ka qaybgashid kooxo ciyaareed, shirarka waalidka, iyo fasalada luqada dhegoolaha ee calaamadaha ah.

- Waxa dhici karta inaad ku nooshahay beel uu ka jiro hal barnaamij ama dhawr barnaamij oo aad kala dooran kartid. Badanaa barnaamijyadu waxay leeyihiin aragtiyo kala duwan oo ku saabsan sida isgaadhsiin loola yeesho caruurta qaba lumis maqal.

Qaybta 5 ee tilmaan-bixiyahan waxa ku yaala war ku saabsan aragtiyada kala duwan ee isgaadhsiinta. Qaybta 8 ee tilmaan-bixiyahan waxa ku taxan barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore ee ku takhasusay sida loola shaqeeyo ilmaha qaba lumis maqal.

AYAA GARGAAR BIXIN KARA?

Waxa aad la kulmi doontaa xirfadley badan iyo dad kale oo gargaari kara adiga iyo ilmahaaga. Qaybtani waxay si kooban u sharaxaysaa cidda ka mid noqon kara kooxda daryeelka ee qoyskaaga, iyo sida mid kasta oo ka mid ah u bixin karo gargaar.

Maqal-yaqaan

- Waxa uu leeyahay tababar iyo qalab sax ah oo uu ku baadho maqalka. **MAQAL-YAQAAN ILMO** waa xirfadle ku takhasusay inuu la shaqeeyo ilmaha yaryar.
- Waxa uu helaa war faahfaahsan oo ku saabsan maqalka ilmahaaga.
- Waxa uu ku taliyaa oo rakibaa cod-weyneeyayaasha (qalabka gargaarka maqalka, hababka FM, qalabka lagu rabiko gudaha dhegta (cochlear implants)).
- Waxa uu ilmahaaga u galiyaa qaab dhegeed (earmold) sax ah oo leeg.
- Waxa uu wax ka beddelaa qalabka gargaarka maqalka ee ilmahaaga marka loo baahdo.
- Waa uu kula shaqeeyo si loo qiimeeyo sida ilmahaagu uga jawaab-celinayo sanqadhaha marka guriga uu joogo.
- Waxa uu ku siin doonaa war ku saabsan ikhtiyaarada wax-ka-qabashada goor hore ee u banaan qoyskaaga.
- Waxa uu la shaqeyn doonaa adiga iyo takhasuslahaaga wax-ka-qabashada goor hore si loo joogteeyo ama loo hagaajiyo cod-weyneeyaha ilmahaaga.

Takhasusle Dhaqancelin Maqal (Aural Rehabilitation)

- Waxa uu horumariyaa farsamooyinka dhegaysiga ee ilmahaaga si ilmahaaga looga gargaaro barashada hadalka iyo luqadda.

La-taliye/Taageere

- Waxa uu taageero niyadeed siiyaa caruurta iyo qoysaska.
- Waxa uu adiga ama qoyskaaga ka gargaaraa arrimaha niyadda ee la xidhiidha lumista maqalka ee ilmahaaga.

Takhasuslaha Wax-ka-qabashada Goor Hore ee Ilmaha Yar & Socod-baradka ah Dhegoole ama Dhego Culus (Early Intervention Specialist for Deaf and Hard of Hearing (D/HH) Infants & Toddlers)

- Waxa uu la shaqeeyaa qoysaska leh caruur dhawaan-dhalad ah ilaa da'da 3 jir ee leh baahiyo isgaadhsiin iyo barasho.
- Waxa uu adiga iyo ilmahaaga siiyaa adeegyo shakhsiga loo qorsheeyay iyo adeegyo qoyska loogu talagalay oo ilmahaaga ka gargaari doona inuu barto isgaadhsiinta iyo farsamooyinka hadalka.
- Waxa uu gargaar ka geystaa qiimeynta awoodaha iyo baahiyaha ilmaha iyo qoyska.
- Waxa uu kaa gargaara ka-jawaabista su'aalaha ku saabsan sida lumista maqalka ilmahaaga ay u saameynayso isgaadhsiinta, barashada, iyo ka-qaybgalka dugsiga iyo bulshada.
- Waxa uu kaala hadli doonaa fiirooyinka iyo walwalka aad qabtid ee ku saabsan ilmahaaga.
- Waxa uu la shaqeeyaa maqal-yaqaanka ilmahaaga si lagaaga gargaaro inaad baratid sida loo isticmaalo cod-weyneeyaha ilmahaaga. Sidoo kale waxa uu gargaar ka geysta hubinta in qalabka gargaarka maqalka ee ilmahaagu si fiican u shaqeynayo.
- Waxa uu diiwaangaliyaa horumarka ilmahaagu ka gaadho isgaadhsiinta iyo korniinka.
- Waxa uu ku siiyaa taageero wakhtiyada adag.
- Waxa uu ku siiyaa fursado aad iskaashi kula yeelatid dadka waaweyn iyo caruurta kale ee leh lumis maqal.
- Waxa uu gargaar ka geystaa sidii loo qeexi lahaa baahiyaha waxbarasho ee ilmahaaga marka ilmahaagu diyaar u yahay inuu ka "qalanjebiyo" barnaamijka wax-ka-qabashada goor hore.

Isu-duwaha Adeegga Qoyska (Family Resource Coordinator (FRC))

- Waxa uu qoysaska leh caruur dhawaan-dhalad ah ilaa da'da 3 jir ka gargaaraa inay helaan adeegyada ay u baahan yihiin.
- Waxa uu qoysaska leh caruur dhawaan-dhalad ah ilaa da'da 3 jir ka gargaaraa inay helaan lacag ay iskaga bixiyaan kharashka adeegyada.

Isu-duwaha Caruurta Leh Baahiyo Daryeel Caafimaad oo Gaar ah (Children with Special Health Care Needs (CSHCN) Coordinator)

- Waxa uu qoysaska leh caruur dhawaan-dhalad ah ilaa da'da 18 jir ka gargaaraa inay helaan adeegyo iyo adeeg-bixiyeyaal.
- Waxa uu qoysaska leh caruur dhawaan-dhalad ah ilaa da'da 18 jir ka gargaaraa isu-duwidda adeegyada iyo taageerada laga helo beeshooda.
- Waxa uu oggalaada qalabka gargaarka maqalka ee loogu talagalay ilmaha ah dhawaan-dhalad ilaa da'da 18 jir ee uu daboolay Medicaid.

Hidde-yaqaan/La-taliye Hidde (Medical Geneticist/Genetics Counselor)

- Waxa uu go'aamiyaa haddii ay jirto sabab hidde oo sal u ah lumista maqal ee ilmahaaga.
- Waxa uu qoysaska siiyaa la-talin ku saabsan saameynnada lumis maqal ee ka timi hidde.

Dhakhtarka Dhegaha (Otologist), Dhakhtarka Dhegaha, Sanka iyo Cunaha (Otolaryngologist) (Ear, Nose, & Throat) (ENT)

- Waxa uu hubsadaa inay jirto xaalad la daweyn karo oo ka jirta dhegta qaybteeda dibadda ah ama dhexda ah oo sabab u ah lumista maqalka.
- Waxa uu kuu sharixi doonaa oo kaala hadli doonaa daweynnada caafimaad ama qalitaan ee suurogalka ah ee loogu talagalay lumista maqalka, oo ay ku jirto gudaha dhegta oo lagu rakibo qalab.
- Waxa uu cilad-sheegaa oo daweyyaa caabuqa dhegaha iyo dhibaatooyinka caafimaad ee kale ee saameyn kara maqalka ilmahaaga.
- Waxa uu aqbalaa ama "oggalaansho dhakhtar" u soo saaraa in ilmahaagu xidho qalabka gargaarka maqalka.
- Waxa uu ballamiyaa baadhitaano kale si macluumaad dheeraad ah looga ogaado sababaha keenay lumista maqalka ee ilmahaaga.

Dhakhtarka Caruurta ama Dhakhtarka Qoyska

- Waxa uu kuu gudbiyaa maqal-yaqaan la shaqeeya caruurta yaryar.
- Waxa uu ka jawaabaa su'aalaha aad qabtid ee ku saabsan daweyn lagu sameeyo lumista maqalka ee ilmahaaga.
- Waxa uu kaa gargaaraa sidaa aad u heli lahayd adeegyada wax-ka-qabashada goor hore.
- Waxa uu daweyyaa ilmahaaga ama waxa uu kuu gudbiyaa takhasusleyaasha dhegta si ay u eegaan dhibaatooyinka qaybta dhexe ee dhegta, sida caabuqa dhegaha, ee saameyn kara maqalka ilmahaaga.

Takhasuslaha Dhibaatooyinka Luqadda (Speech Language Pathologist)

- Waxa uu bixiyaa waxqabad hadal iyo luqadeed si ilmahaaga looga gargaaro in hadalkiisu noqdo mid la fahmi karo.
- Waxa uu qiimeeyaa farsamooyinka hadal iyo luqadeed ee ilmahaaga.

Waalidka Kale ee Leh Ilmo Dhegoole ah ama Dhego Culus

- Waxay kula wadaagi doonaan waayaha soo maray.
- Waxay kuu sheegi doonaan dadka iyo adeegyada gargaar laga helo ee ay yaqaanaan.
- Way ku dhegaysan doonaan.
- Waxay kula wadaagi doonaan dareemadooda ku saabsan waalid-u-ahaanta ilmo qaba lumis maqal.
- Waxay kuu sheegi doonaan guulaha ilmahooda.
- Way kula kulmi doonaan si caruurtiinu u wada ciyaaraan.

Dadka Waaweyn ee Dhegoolaha ah ama Dhego Culus

- Waxay kula wadaagi doonaan waayahooda ku saabsan ahaanshaha qof dhego la' ama dhego culus.

- Waxay kula wadaagi doonaan aragtidooda waxbarasho, bulsho iyo dhaqameed.
- Waxay ku tusi doonaan habab isgaadhsiin oo kala duwan.
- Waxay ilmahaaga u noqon doonaan qof ku-dayasho leh.
- Waxay qoyskaaga siin doonaan dhiirigalin ku saabsan sida looga gudbo caqabadaha ee loo koriyo ilmo guulaysan doona.

MAQALKA ILMAHAAGA

Waxay u badan tahay inaad qabtid su'aalo badan oo ku saabsan maqalka ilmahaaga, iyo macnaha lumista maqalka ee ilmahaaga. Qaybtani waxay ku saabsan tahay:

- Sida dhegtu u shaqeeyso.
- Sida loo baadho maqalka ilmahaaga.
- Noocyada iyo darajooyinka lumista maqalka.
- Cabirka maqalka (audiogram).
- Su'aalaha inta badan la iska weydiiyo lumista maqalka.

Sidee Bay Dhegtu u Shaqeysa?

QAYBAHA DHEGTA

Dhegtu waxay leedahay saddex qaybood – dhegta dibadda, dhegta dhexda, iyo dhegta gudaha. Mid kasta oo ka mid ah saddexdaa qaybood waxa uu u sii kala baxaa qaybo sii yaryar.

DHEGTA DIBADDA:

- Masafka dhegta (qaybta aynu aragno) (pinna).
- Dhuunta dibadda ee dhegta (dhuunta maqalka ee dibadda) (ear canal).

DHEGTA DHEXE:


- Xuubka durbaanka ah (durbaanka dhegta) (eardrum).
- Lafaha yaryar (dubadaha, salka, iyo rakaabka (hammer, anvil, and stirrup).
- Dhuunta gudaha (Eustachian tube).

DHEGTA GUDAHA:

- Habka dheelitirka (vestibular system) (dheelitirka jidhka).
- Dareemaha dheelitirka (vestibular nerve).
- Kokliya (cochlea).
- Dareemaha maqalka.

SIDEE ILMAHAYGU U MAQLAA SANQADHA?

- Sanqadhu waxay soo gashaa dhegta waxana ay sii martaa dhuunta dhegta ilaa durbaanka dhegta (xuibka durbaanka ah). Halkaa ayay sanqadhu uga sii gudubtaa dhegta dhexe.
- Sanqadhu waxay keentaa in durbaanka dhegtu gariiro, taasoo keenta in saddexda lafood ee yaryar ee dhegta dhexe dhaqaaqaan.
- Dhaqaaqa lafaha yaryar waxa uu keena in cadaadiska hoore ku jira dhegta dhexe is beddelo (waa kokliyaha).
- Isbeddeladaa cadaadisku waxay keenaan in qayb ku taala dhegta dhexe, oo loo yaqaano xuub saleedka (basilar membrane), uu dhaqaajiyo unugyada timaha kokliya.
- Dhaqaaqa unugyada timaha kokliya ayaa dira dhambaal maraya dareemaha maqalka ilaa maskaxda.



Hab-dhiska Dhegta.

Sidee Baa Loo Baadhaa Maqalka Ilmahayga?

Waxa jira siyaabo badan oo loo baadho maqalka ilmahaaga. Nooca baadhitaan ee ilmahaaga loo sameeyo waxay ku xidhan tahay baahiyaha iyo awoodaha ilmahaaga.

- **BAADHITAANADA MAQALKA EE AAN DAREEN-CELIN LAGA RABIN (OBJECTIVE HEARING TESTS)** waxa la sameeyaa marka ilmahaagu hurdo ama uu si degan u nasanayo. Lagama rabo ilmahaaga inuu wax dareen ama jawaab ah ka soo celiyo sanqadha baadhitaanka.
- **BAADHITAANADA MAQALKA EE LA RABO DAREEN-CELIN** waa baadhitaano la rabo in ilmahaagu dareen ama jawaab ka bixiyo sanqadha. Ilmahaagu waxa uu dareenkiisa ku muujin doonaa madaxa oo uu leexiyo, ciyaar fudud oo uu ciyaaro, ama gacanta oo uu sare u qaado.

Ilmahaaga waxa la baadhi karaa iyada oo la isticmaalo tabin hawo (air conduction), tabin laf (bone conduction) ama labadaba.

- **TABINTA HAWADA** waxa lagu tijaabiyaa habka maqalka oo dhan, oo ay ku jirto dhegta dibadda, dhegta dhexe, dhegta gudaha iyo ilaa maskaxda. Ilmahaagu waxa uu maqlaa sanqadh ka imanaysa samaacado dhegta la saaro ama samaacado caadi ah.
- **TABINTA LAFTA** waa marka gariirka sanqadhu maro qolfoofka ama lafaha madaxa una gudbo dhegta gudaha iyo maskaxda. Waxa laga boodaa dhegta dibadda iyo dhegta dhexe, waxana lagu tijaabiyaa kaliya dhegta gudaha ilaa maskaxda. Sanqadha waxa ilmahaaga loo gudbiyaa iyada oo la isticmaalayo qalab la yidhaahdo gariire lafeed (bone oscillator) (oo ah gariire yar) kaasoo la saaro lafta ka dambeysa dhegta.
- Tabinta hawada iyo tabinta lafta oo la wada isticmaalo waxay maqal-yaqaanka ka gargaarayso inuu garto barta keenaysa maqal lumista ilmahaaga.

Baadhitaanada Maqalka Ee Aan Dareen-Celin Laga Rabin

BAATHITAANKA BAER TEST

- BAER waxay u taagan tahay Brainstem Auditory Evoked Response. Waxa kale oo laga yaabaa inaad aragtid baadhitaankan oo loogu yeedhay ABR, BER, ama AABR.

- Baadhitaankanu waxa uu cabirayaa sida dareemaha ilmahaagu u dareemayo sanqadha.
- Waxa loo isticmaalaa ilmaha yaryar ee aan gaadhin da' ay kaga jawaabaan sanqadha iyaga oo leexinaya madaxooda. Waxa kale oo loo isticmaali karaa caruurta ka sii da' roon ee aan loo sameyn karin baadhitaanada maqalka ee la rabo dareen-celin. Marmarka qaarkood waxa baadhitaanka BAER loo isticmaalaa si loo xaqiijiyo natiijooyinka baadhitaan maqal oo ah nooca leh dareen-celinta.
- Talaabooyinka baadhitaanka maqalka ee BAER waa:
 1. Waa in ilmahaagu hurdo. Haddii ilmahaaga la baadho ka hor da'da 6 bilood, waxa baadhitaanka la sameeyaa inta uu si dabiici ah u hurdo. Caruurta ka weyn da'da 6 bilood caadi ahaan waxa seexiya dawo seexasho oo khafiif ah oo uu qoro dhakhtar.
 2. Maqaarka ilmaha waa la nadiifiyaa ka dibna qalab dareeme ah ayaa la saaraa dhafoorkiisa iyo meel ah dhegta xaggeeda dambe.
 3. Sanqadho ayaa lagu shidaa dheg kasta iyada la isticmaalayo samaacad dheg oo ah caag jilicsan.
 4. Kombiyuutar ayaa qora jawaabta dareemaha maqalka ee ilmahaaga.
 5. Maqal-yaqaanka ilmahaagu waxa uu eegi doonaa sanqadha ugu khafiifsan ee dareemaha maqalka ilmahaagu ka jawaabo.

BAADHITAANKA EOAE

- EOAE waxa uu u taagan yahay Evoked Otoacoustic Emissions. Waxa kale oo laga yaabaa inaad aragto baadhitaankan oo loogu yeedhay OAE, TEOAE, ama DPOAE.
- Baadhitaankani waxa uu cabiraa sida uu u shaqeynayo kokliyaha, ama dhegta gudaha ee ilmahaaga.
- Badanaa waxa la sameeyaa isla booqashada lagu sameynayo baadhitaanka BAER.
- Waxa loo baahan yahay in ilmahaagu uu degan yahay inta lagu jiro baadhitaankan.
- Talaabooyinka baadhitaanka EOAE waa:
 1. Samaacad dhego oo ah caag jilicsan ayaa la saaraa labada dhegood ee ilmahaaga.
 2. Sanqadho ayaa la mariyaa saamaacadaha.

3. Kombiyuutar ayaa cabira jawaabta dhegta gudaha ee ilmahaaga.
4. Maqal-yaqaanku waxa uu qiimeeyaa jawaabta.

BAADHITAANKA TYMPANOMETRY

- Baadhitaankani waxa uu maqal-yaqaanka ka gargaaraa inuu ogaado sida ay dhegta dhexe ee ilmahaagu u shaqeynayso.
- Talaabooyinka baadhitaanka tympanometry waa:
 1. Maqal-yaqaanku waxa uu caaro caag (wax dhuuban) galiyaa dhegta ilmahaaga.
 2. Caaradu waxay ku xidhan tahay mishiin wax ka beddelaya cadaadiska hawada ee dhegta ilmahaaga. Mishiinku waxa uu daabacayaa garaaf.
 3. Garaafku waxa uu bixiyaa war ku saabsan in hoore uu ku jiro dhegta dhexe, ama haddii durbaanka dhegtu aannu dhaqaaq sameynaynin. Baadhitaanka waxa la sameyn karaa da' kasta, laakiin waxay si fiican u shaqeysaa marka ilmahaagu jiro ugu yaraan 6 bilood.

Baadhitaanada Maqalka ee Dareen-celin la Rabo

Waa in ilmahaagu jiro ugu yaraan 6 ilaa 7 bilood si loo sameeyo baadhitaanka maqalka ee dareen-celin la rabo. Waxa la rabaa in ilmuhu awoodo inuu kaligii fadhiyi karo oo si wacan madaxa u xukumi karo.

BAADHITAANKA VISUAL REINFORCEMENT AUDIOMETRY (VRA)

- Baadhitaankan waxa lagu sameeyaa qol aan sanqadhu ka baxaynin. Waxa la rabaa in ilmahaagu madaxa leexiyo marka uu jawaab ka bixinayo waxa uu maqlay.
- Ilmuhu waxa uu ku fadhi doonaa dhabtaada gudaha qolka.
- Qof caawiye ah ayaa fadhiisan doona hortaada iyo horta ilmahaaga. Caawiyahaasi waxa uu soo jeediyaa ilmahaaga isaga oo isticmaala alaab caruur-ciyaarsiis.
- Labada dhinac waxa ilmahaaga ka xiga sanduuqyo madow. Sanduuqyadaas waxa ku jira alaab caruur-ciyaarsiis oo uu maqal-yaqaanku iftiimin karo marka ilmahaagu ka jawaabo sanqadha uu maqlay.

- Ilmahaagu waxa uu sanqadha ka maqli doonaa samaacad ama sacaamadaha dhegaha.
- Maqal-yaqaanku waxa uu ilmahaaga barayaa inuu madaxiisa u leexiyo xagga sanqadha uu maqlo iyada oo jawaab-celintiisa lagu dhiirigalinayo alaabta caruur-ciyaarsiiska ee ku jirta sanduuqyada iftiinka leh.
- Maqal-yaqaanku waxa uu heli doonaa sanqadhaha ugu khafiifsan ee ilmahaagu jawaab ka bixiyo.

BAADHITAANKA CONDITIONED PLAY AUDIOMETRY (CPA)

- Baadhitaanka conditioned play audiometry waxa caadi ahaan loo isticmaalaa caruurta jira 3 sannadood ama ka weyn.
- Ilmahaagu waxa uu fadhiyi doonaa dhabtaada ama kursi gudaha qol aan sanqadhu ka baxaynin, oo loo yaqaano qolka sanqadha.
- Ilmahaagu waxa uu sanqadha ka maqli doonaa samaacad ama sacaamadaha dhegaha.
- Maqal-yaqaanku waxa uu ilmahaaga bari doonaa inuu ciyaaro ciyaar fudud, sida bulukeeti ama laban uu ku rido baaldi ama qori uu galiyo god wakhti kasta oo uu maqlo sanqadha.
- Maqal-yaqaanku waxa uu heli doonaa sanqadhaha ugu khafiifsan ee ilmahaagu jawaab ka bixiyo.

BAADHITAANKA SPEECH AWARENESS THRESHOLD (SAT)

- Baadhitaankani waxa uu cabirayaa ka-warqabidda hadalka ee ilmahaaga.
- Waa baadhitaan gargaar leh sababta oo ah waxa jirta in ilmaha aad u yaryar qaarkood ay ka jawaabaan hadalka ka hor inta aanay wax jawaab-celin ah ka bixinin sanqadh aan hadal ahayn ama muusig ah.
- Maqal-yaqaanku waxa uu sanqadha ilmahaaga maqalsiin doonaa isaga oo isticmaalaya samaacad ama samaacado dhego.
- Maqal-yaqaanku waxa uu heli doonaa sanqadhaha ugu khafiifsan ee ilmahaagu jawaab ka bixiyo.

BAATHITAANKA SPEECH RECEPTION THRESHOLD (SRT)

- Baadhitaankani waxa uu cabiraa awoodda ilmahaagu u leeyahay garashada ereyada.

- Waa in ilmahaagu yaqaano magacyada xoogaa ah alaab caam ah si loogu sameeyo baadhitaankan.
- Maqal-yaqaanku waxa uu ilmahaaga dhegeysiin doonaa ereyo isaga oo isticmaalaya samaacad ama samaacado dhego.
- Maqal-yaqaanku waxa uu ilmahaaga weydiin doonaa inuu ku soo celiyo ereyada uu maqlay, ama tilmaamo sawirada alaabta.
- Maqal-yaqaanku waxa uu heli doonaa heerka ugu khafiifsan ee ilmahaagu ku maqli karo ereyo.

Immisa Jeer Ayaa la Baadhi Doonaa Maqalka Ilmahayga?

Maqalka ilmahaaga waxa lagu baadhi doonaa jadwal uu soo go'aamiyay maqal-yaqaankaagu. Baadhitaanadaasi waxay u habsan doonaan in aan maqalkiisu is beddelin. Waxa kale oo laga yaabaa in ilmahaaga loo sameeyo baadhitaano maqal isaga oo xidhan qalabka gargaarka maqalka.

Ku Saabsan Lumista Maqalka

WAA MAXAY LUMIS MAQAL?

Lumista maqal waa awood-dari ah xagga dareemista sanqadha. Dad badan ayaa isku daya inay lumista maqalka ku cabiraan hab ah boqolley. Taasi ma ah habka ugu saxsan ee lagu cabiri karo. Waxa fiican in loo sharaxo nooc iyo darajo lumis maqal.

NOOCYADA LUMIS MAQAL

Nooca lumis maqal waxa uu ku xidhan yahay meesha uu ka dhacay dhegta gudaheeda. Lumista maqalka ee ilmahaaga waxa lagu sharixi karaa nooc ah tabin (conductive), dareemid (sensorineural) ama isku-jir (mixed).

- **LUMIS MAQAL OO AH TABIN** macnihiisu waxa weeye dhibaatooyin ayaa ka jira qaybaha dibadda ama dhexda ee dhegta. Badanaa, waxa jira wax ah dhegta dhexe ama dhegta dibadda oo sanqadha ka horjoogsanaya inay u sii gudubto qaybaha kale. Marmarka qaarkood daweyn ama qalitaan ayaa wax lagaga qaban karaa noocan lumis maqal.

- **LUMIS MAQAL OO AH DAREEMID** macnihiisu waxa weeye dhibaato ayaa ka jirta kokliyaha (dhegta gudaha) ama dareemaha maqalka. Inta badan noocan lumis maqal dhibkiisu waa mid joogto ah ama aan isbeddel lahayn. Badanaa daweyn ama qalitaan waxba kama qabtaan. Qalabka gargaarka maqalka ayaa badanaa gargaar laga helaa.
- **LUMIS MAQAL OO ISKU-JIR AH** macnihiisu waxa weeye dhibaato ayaa ka jirta dhegta dibaada ama dhegta dhexe iyo dhegta gudaha.

Lumista maqalka ee ilmahaaga waxa kale oo lagu sharixi yahay inuu yahay hal dhinac ama laba dhinac.

- **HAL DHINAC** macnaheedu waxa weeye lumista maqalku waa hal dheg kaliya.
- **LABA DHINAC** macnaheedu waxa weeye lumista maqalku waa labada dhegoodba.

DARAJADA LUMISTA MAQALKA

Darnaanta lumista maqalka waxa lagu cabiraa darajooyin. Waxa jira afar darajo oo ah lumis maqal. Darajooyinka lumis maqal waxa lagu cabiraa desibel (decibels) (dB). Desibel waa cabirka xoogga ama weynaanta sanqadha. Marka tirada desibelku sii weyn tahay, sanqadhu waa mid sii weyn.

LUMIS MAQAL OO KHAFIIF AH: Sanqadhaha ka khafiifsan 25-40 dB lama dareemo.

LUMIS MAQAL OO DHEXDHEXAAD AH: Sanqadhaha ka khafiifsan 40-65 dB lama dareemo.

LUMIS MAQAL OO DARAN: Sanqadhaha ka khafiifsan 65-90 dB lama dareemo.

LUMIS MAQAL OO SI WEYN U DARAN: Sanqadhaha ka khafiifsan 90 dB lama dareemo.

Waxa dhici karta in lumista maqal ee ilmahaagu aanay ka tirsanayn kaliya hal nooc oo ah kuwaa la soo sheegay. Tusaale ahaan, waxa dhici karta in laguugu sheego mid khafiif ilaa dhexdhexaad ah, ama mid daran ilaa nooc si weyn u daran. Shaxanka ku yaala bogga 21 ayaa muujinaya sida darajooyinka kala duwan ee lumista maqalku u saameyn karaan barashada hadalka ee ilmahaaga. Waa inaad maskaxda ku haysid in lumis maqal oo isku mid ah ay siyaabo kale duwan u saameyn karto caruurta kala duwan.

EREYADA LOO ISTICMAALO LUMISTA MAQALKA

Dad badan ayaa isku khalda ereyada ah “maqalka ka dhibaateysan” (hearing impaired), “dhego culus” (hard of hearing), “dhegoole” (deaf), iyo “Dhegoole” (Deaf).

- **Ka dhibaateysan maqalka (hearing impaired)** waxa loo isticmaalaa ilmo leh darajo kasta oo ah lumis maqal. (Dad badan ayaan jeclayn ereygan oo doorbida inay isticmaalaan ereyada dhego culus (hard of hearing).)
- **dhego culus (hard of hearing)** waxa la isticmaalaa haddii ilmuhu u leeyahay darajo lumis maqal oo ah khafiif ilaa mid daran.
- **dhegoole (deaf)** (oo xarafka hore yar yahay ama d yar) waxa la isticmaalaa haddii ilmuhu leeyahay darajo lumis maqal oo daran ama si weyn u daran. Haddii aad aragtid ereyga dhegoole oo loogu horeysay xaraf yar ama d, macnihiisu waa “maqal ahaan waa dhegoole.”
- **Dhegoole (Deaf)** (oo leh xaraf hore oo weyn ama D weyn) waxa isticmaalaa Beesha Dhegooleyaasha waxana loola jeeda “leh dhaqanka dhegoolaha.” Qofku waxa uu lahaan karaa darajo kasta oo ah lumis maqal si uu uga tirsanaado Beesha Dhegooleyaasha. Xubnaha Beesha Dhegooleyaashu waxay isticmaalaan luqadda dhegooleyaasha ee calaamadaha ah, waxana ay leeyihiin dhaqan ay u garanayaan inuu yahay kooda. Waxa dhici karta inay maqal ahaan dhegoole yihiin ama aanay ahayn.

Darajo Lumis Maqal	Waxa Macnaheedu Yahay	Marka Aanuu Jirin Cod-weyneeye iyo Wax-ka-qabasho Goor Hore	Marka uu Jiro Cod-weyneeye iyo Wax-ka-qabasho Goor Hore
Khafiif	Sanqadha ugu khafiifsan ee ilmuhu maqlo waa heerar ah 25 dB-40 dB. Sanqadha intaa ka sii khafiisan lama dareemo.	<ul style="list-style-type: none"> – Sanqadha khafiifka ah sida tuubada biyaha oo da'aysa, shimbiro heesaha, iyo sanqadhaha hadalka qaarkood waxa dhici karta inaan la maqlin. – Sanqadhaha qofka maqalkiisu caadi yahay ula eeg dhexdhexaad, sida hadalka, waxay noqon doonaan kuwo khafiif ah. – Ilmaha waxa dhib ku noqon doona inuu maqlo hadalka daciifka ah ama fog, waxana laga yaabaa in maqalku dhib ku noqdo marka goobtu buuq badan tahay. 	<ul style="list-style-type: none"> – Caruurta intooda badani way garan karaan oo fahmi karaan sanqadhaha khafiifka ah ee hadalka iyo waxyaabaha agagaarkooda ah.
Dhex-dhexaad	Sanqadha ugu khafiifsan ee ilmuhu maqlo waa heerar ah 40 dB - 65 dB. Sanqadha intaa ka sii khafiisan lama dareemo.	<ul style="list-style-type: none"> – Sanqadhaha hadalka intooda badan, iyo sanqadhaha ka sii xoog weyn sida saacad garaac sameynaysa, ama nafiidiyaha faakiyuum waxa dhici karta inaan la maqlin. – Sanqadhaha qofka maqalkiisu caadi yahay ula eeg dhexdhexaad waxay noqon doono kuwo khafiif. – Hadalka waxa la fahmi kara kaliya haddii uu xoog leeyahay ama sareeyo. – Waxa laga yaabaa in ilmaha awooddiisu xad leedahay xagga ereyada, fahamka hadalka iyo isticmaalka hadalka. – Waxa laga yaabaa in hadalka ilmaha ay ku jiraan khaladaad. 	<ul style="list-style-type: none"> – Caruurta intooda badani way garan karaan oo fahmi karaan sanqadhaha khafiifka ah ee hadalka iyo waxyaabaha agagaarkooda ah. – Badi caruurta waxay yeelan doonaan ereyo, faham hadal iyo isticmaal hadal oo da'dooda ku haboon. – Badi caruurta waxay baran doonaan inay ilaaliyaan hadalkooda iyo inay si cad u hadlaan.

Darajo Lumis Maqal	Waxa Macnaheedu Yahay	Marka Aanuu Jirin Cod-weyneeye iyo Wax-ka-qabasho Goor Hore	Marka uu Jiro Cod-weyneeye iyo Wax-ka-qabasho Goor Hore
Daran	Sanqadha ugu khafiifsan ee ilmuhu maqlo waa heerar ah 65 dB – 90 dB. Sanqadha intaa ka sii khafiisan lama dareemo.	<ul style="list-style-type: none"> – Badani hadalka lama fahmi doono, isla markaana sanqadhaha kale ee xoogga leh sida teleefon dhacaya ama ey ciyaya waxa laga yaabaa inaan la maqlin. – Sanqadha si weyn xoog ula leh qofka maqalkiisu caadi yahay waxay u eekaan doonaan kuwo si weyn khafiif u ah. – Hadalka waxa kaliya ee la fahmi doonaa marka dhegta lagu qayliyo. – Fahamka luqadda lagu hadlo iyo hadalku uma iman doonaan si caadi ah. – Ilmo qaba lumis maqal oo daran hadalkiisa badi lama fahmi doono. 	<ul style="list-style-type: none"> – Badi caruurto way dareemi karaan oo fahmi karaan sanqadhaha intooda badan. – Badi caruurto waxay baran karaan inay fahmaan oo isticmaalaan hadalka lagu sheekeysto, xiita haddii aanay hadalka u maqlaynin sida dadka maqalkoodu caadi yahay. – Badi caruurto waxay u baahan doonaan ku-talogal gaar ah, gaar ahaan dugsiga, si looga gargaaro dhibaatooyinka ka imanaya fogaanta iyo sanqadhaha agagaarka.
Daran ama Si Weyn u Daran	<p>Sanqadha ugu khafiifsan ee ilmuhu maqlo waa heerar ah 90 dB or more. Sanqadha intaa ka sii khafiisan lama dareemo.</p> <p>Ilmo qaba lumis maqal oo daran waxa loogu yeedhi karaa dhegoole.</p>	<ul style="list-style-type: none"> – Sanqadhaha sida weyn u qaylo badan sida diyaarad dusha duulaysa ama mishiinka cawska jara lama dareemi doono. – Ilmuhu waxa uu isgaadhsiinta koobaad u adeegsan doonaa aragga halkii uu maqalka ka isticmaali lahaa. – Ilmuhu waxa uu yeelan doonaa hadal aan la fahmaynin. 	<ul style="list-style-type: none"> – Caruur badan ayaa dareemi kara sanqadho xoogoodu dhexdhexaad yahay iyo hadalka sheekaysiga marka ay jiraan xaalado dhegaysi oo fiican (marka aanay jirin qaylo agagaarka ka jirta kuna sii jeedaan qofka hadlaya). – Caruur badan ayaa wali u baahan doona isgaadhsiin arag ah si looga gargaaro fahamka hadalka sheekaysiga. – Badi caruurto waxay u baahan doonaan ku-talogal gaar ah, gaar ahaan dugsiga, si looga gargaaro dhibaatooyinka ka imanaya fogaanta iyo sanqadhaha agagaarka. – Caruur badan ayaa yeelan kara ereyo, faham hadal iyo isticmaal hadal oo da'dooda ku haboon.

Cabirka Maqalka (Audiogram) ee Ilmahaaga

WAA MAXAY CABIR MAQAL?

Cabirka maqalku waa garaaf muujinaya sanqadhaha ugu khafiifsan ee ilmahaagu maqlo.

Dhawr tilmaamood ayaa kaa gargaari doona inaad fahamtid garaafka:

Dusha garaafka waxa ku yaalaa firikuwensiyo.

- Firikuwensiyada waxa loo habeeyay sida fureyaasha qalabka muusikada ee biyaanada loo yaqaano. Codadka hoose waxay ku yaalaan bidixda halka codadka sare ay ku yaalaan midigta.
- Cod firikuwensi hoose waxa tusaale u ah durbaan, isla markaana cod firikuwensi sare waxa tusaale u ah cod shimbir.
- Firikuwensiyada waxa lagu cabiraa Hertis (Hz).

Dhinaca garaafka waxa ku yaala laxaadka, ama weynaanta codka.

- Codadka ku yaala xagga sare ee garaafka waa kuwo khafiif ah.
- Codadka ku yaala xagga hoose ee garaafka waa kuwo qaylo badan.
- Weynaanta codka waxa lagu cabiraa desibelo (dB).

Calaamadaha ku yaala cabirka maqalka ee ilmahaaga waxay u taagan yihiin sanqadhaha ugu khafiifsan ee ilmahaagu dareemay intii lagu jiray baadhitaanka maqalka.

Haddii ilmahaaga loo galiyay samaacadaha dhegaha intii baadhitaanku socday, waxa aad arki doontaa **X** iyo **O** ku qoran garaafka.

X = dhegta bidix

O = dhegta midig

Haddii ilmahaaga aan loo xidhin samaacado dhego intii lagu jiray baadhitaanka, waxa aad arki doontaa **S** ku yaalaa cabirka maqalka.

S macnaheedu waxa weeye ilmahaaga waxa la baadhay iyada oo la isticmaalay samaacado.

Marka la isticmaalayo samaacado, kaliya waxa la tijaabiyaa dhegta fiican ee ilmahaaga.

^ ama **Π** macnaheedu waxa weeye ilmahaaga waxa la baadhay iyada oo la isticmaalay tabinta lafta.

A macnaheedu waxa weeye ilmahaaga waxa la baadhay iyada oo isticmaalay qalabka gargaarka maqalka.

MAXAA CABIRKA MAQALKA EE ILMAHAYGU II SHEEGAYAA?

Maqal-yaqaankaaga ayaa awoodi doona inuu si faahfaahsan kuugu sharaxayo cabirka maqalka ee ilmahaaga. Cabirka maqalka ee ilmahaagu waxa uu ka jawaabi doonaa su'aalahan soo socda:

- Maqalku labada dhegood ba ma isku mid baa, mise waa kala duwan yahay?
- Maqal lumis intee leeg ayaa ilmahaagu qabaa? (darajo lumis maqal)
- Ma jira lumis maqal oo u badan firikuwensiyada qaarkood?
- Ma jiraa faraq u dhexeeya maqalka marka la eego tabinta hawada iyo tabinta lafta? (faraq hawo-laf)
- Sidee baa ilmahaagu wax ugu maqlaa qalabka gargaarka maqalka?

Cabirka maqalka ee ku yaala bogga soo socda waxa ku yaala sawiro muujinaya sanqadhaha la maqli karo marka la eego firikuwensiyada kala duwan, iyo laxaadyada, ama weynaanta sanqadhaha.

- Aagga cawlan ee hadheysan waxa la yidhaahdaa “mooska hadalka” sababta oo qaabkiisa oo moos/muus u eg.
- Aaggaa u eg qaabka mooska waxa uu muujinayaa meesha codadka kala duwan ee hadalku kaga yaalaan cabirka maqalka.
- Xiitaa lumis wakhti oo khafiif ah waxay saameyn doontaa awoodda barashada hadalka iyo luqadda ee ilmahaaga.


QAABKA LUMIS MAQAL EE ILMAHAAGA

Waxay u badan tahay in lumista maqal ee ilmahaagu aanay u eekaan doonin xariiq toosan. Maqalka ilmahaagu waxa uu noqon doonaa habda si marka la eego firikuwensiyada kala duwan. Tusaalooyinka lumis maqal oo caam ah waxa ka mid ah:

- Lumis maqal oo janjeedh ah (sloping hearing loss) -- Taasoo macnaheedu yahay in maqalka ilmahaagu u fiican yahay xagga firikuwensiyada hoose.
- Lumis maqal oo ah isweydaar janjeedh (reverse sloping hearing loss) -- Taasoo macnaheedu yahay in maqalka ilmahaagu u fiican yahay xagga firikuwensiyada sare.
- Lumis maqal oo leh janjeedh dhakhso ah (precipitously sloping hearing loss) (janjeedh daran oo dhaksho ah) -- Taasoo macnaheedu yahay in maqalka ilmahaagu si dhakhso ah hoos u dhacayo marka la eego firikuwensiyada sare.
- Lumis maqal oo dhexda ah (cookie bite) -- Taasoo macnaheedu yahay in maqalka ilmahaagu u fiican yahay firikuwensiyada hoose iyo kuwa sare, laakiin u xun yahay kuwa dhexe.

CABIRKA MAQALKA EE CODADKA CAAMKA AH

FIRIKUWENSI AH WAREEGYO (CYCLES) HALKII SEKAN (HZ)



AMERICAN
ACADEMY OF
AUDIOLOGY



<http://www.audiology.org>

11730 Plaza America Dr., Ste. 300, Reston VA 20190 • 703-790-8466 • 800-AAA-2336 • Fax: 703-790-8631

Cabirka Maqalka ee Codadka Caamka ah waxa la isticmaalay iyada oo ruqsó laga haysto
American Academy of Audiology – www.audiology.org.

Su'aalaha Inta Badan la Iska Weydiiyo Lumista Maqalka

WAA IMMISA BOQOLKIIBA LUMISTA MAQAL EE ILMAHAYGU QABO?

Way adag tahay in lumista maqalka lagu sharaxo tiro ah boqolley. Sababta oo ah lumista maqalka oo si weyn kala-duwanaan u yeelan karta marka la eego firikuwensiyada kala duwan, waxa badanaa lagu sharaxayaa ereyo ah nooca iyo darajada lumis maqal, iyo qaabka lumis maqal. Haddii qofka kuu sharaxaya lumista maqal ee ilmahaagu isticmaalo tiro ah boqolley, la hadal maqal-yaqaankaaga si aad u heshid sharaxaad fiican.

LUMISTA MAQALKA EE ILMAHAYGU MA SOO FIICNAAN DOONTA MISE WAY KA SII DARI DOONTAA?

Way adag tahay in taa go'aan laga soo saaro. Haddii ilmahaagu qabo lumis ah tabinta, marmarka qaarkood maqalkiisu waa uu soo fiicnaan karaa. Haddii ilmahaagu qabo lumis maqal oo ah dareemeyaasha (sensorineural), waxay u badan tahay in aanuu ka soo fiicnaan. Lumista maqal qaarkood mudo ka dib way ka sii dari karaan. Kuwaa waxa la yidhaahdaa LUMIS MAQAL OO SII SOCOD LEH (PROGRESSIVE HEARING LOSSES). Maqalka ilmahaaga oo aad si joogto ah u baadhid waxay sugi doontaa in maqalkiisu aanuu ka sii daraynin, iyo inuu helo cod-weyneysiinta ku haboon. Dhakhtarkaaga dhegta, sanko iyo cunaha (ENT) ama dhakhtarkaaga caruurta ayaa laga yaabaa inuu ku siiyo war dheeraad ah oo ku saabsan suurogalka in maqalka ilmahaagu ka sii darayo mudo ka dib.

MAXAA KEENAY LUMISTA MAQAL EE ILMAHAYGA?

Tiro ka badan boqolkiiba konton (50%) caruurta ku dhalata lumis maqal ayaan lahayn qodob halis oo la ogaa oo ku saabsan u-nuglaanta lumista maqalka. Sababaha ugu caamsan ee lumista maqalka waxa ka mid ah:

- Taariikh qoysku u lahaa lumis maqal.
- Cilad la yaqaano inay keento lumis maqal.
- Qaab waji-madax oo aan caadi ahayn, sida faruur ama dhanxanag kala jeexan, godad dhegaha ah, ama dacallo dhegta ah.
- Caabuqyada qaarkood ee hooyada ku dhaca inta ay uurka leedahay sida CMV (cytomegalovirus), toxoplasmosis, cagaarshow/joonis (herpes) iyo jadeeco jarmal (rubella)

- Cisbitaalka qaybtiisa daryeelka siyaadada ah oo la dhigo mudo ka badan 48 saacadood.
- Meninjaytiska bakteeriyada (bacterial meningitis).
- Caabuq dhego oo soo noqnoqda.

Kuwaasi waxay ka mid yihiin qodobada halista ee ugu caamsan ee keena lumis maqal. Maqal-yaqaankaaga ama dhakhtarkaaga ayaa ku siin kara war dheeraad ah oo ku saabsan qodobo halis oo kale iyo sababaha lumis maqal.

SIDEE BAA ILMAHAYGU ISGAADHSIIN U SAMEYN DOONAA?

Ilmahaaga iyo qoyskaaga oo aad ka gargaartid isgaadhsiinta si weyn bay muhiim u tahay. Waxa aad heli doontaa war badan iyo ikhtiyaaro badan oo ku saabsan waxa ugu fiican ilmahaaga. Qaybtani waxay ku siin doontaa warka aad u baahan tahay si aad u bilawdid inaad baratid ikhtiyaarada aad u dooran kartid ilmahaaga iyo qoyskaaga. Waxa jira habab badan oo loo sameeyo isgaadhsiin. **Waa in habka aad dooratid uu ilmahaaga si buuxda ugu furayo iridda isgaadhsiinta. Sidoo kale waa in habkaasi yahay mid lagu isticmaalayo luqadda koobaad ee guriga lagaga hadlo (sida Ingiriisi, Isbaanish, Luqadda Dhegoolaha ee Calaamadaha ah ee Maraykanka (American Sign Language), iwm.).** Qoyskaagu waxa uu u baahan doonaa inuu u go’o isticmaalka habka aad dooratid. Marka aad dooratid hab, waa inaad maskaxda ku haysid in aanuu jirin hab u fiican dhamaan caruurta. Markasta waxa aad gaadhi kartaa go’aan kale haddii baahiyaha ilmahaagu is beddelaan.

Sida Lumista Maqalku u Saameyso Isgaadhsiinta

Lumis maqal oo ku dhacday ilmo yar way ka duwan tahay lumis maqal oo ku dhacday qof weyn. Sababtu waxa weeye ilmaha yar oo aan wali barin hadal iyo luqad. Dadka waaweyn ee qaba lumis maqal way yaqaanaan xeerarka luqadda waxana ay ku dabiqli karaan sheekaysigooda maalin kasta. Ilmaha waalidkoodu guriga kaga hadlaan luqad lagu hadlo, waxa dhacaysa in xiitaa lumis maqal oo khafiif ahi ay saameyn karto awooddiisa inuu yeesho hadal iyo luqad. Ilmuhu waxay u baahan yihiin inay maqlaan dhamaan codadka luqaddooda si ay u bartaan inay hadlaan. Sidoo kale, ilmaha waalidkiisu yahay Dhegoole isticmaala luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah si ay isgaadhsiin u sameeyaan waxa uu luqad baran doonaa marka uu daawado luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah.

Marka luqad lagu hadlo guriga laga isticmaalo, ilmaha qaba lumis maqal waxa dhibaato ka soo gaadhaysa helitaan isgaadhsiin. Inta ay leeg tahay saameynta lumista maqalka ee ilmahaagu waxay ku xidhan tahay qodobadda ay ka mid yihiin:

- Nooca lumis maqal.
- Darajada lumis maqal.
- Qaabka lumis maqal.
- Sida qoyskaagu uga qaybgalo horumarinta isgaadhsiinta ilmahaaga.
- Da'da ay lumista maqalku ku dhacday ilmahaaga.
- Da'da lagu gartay lumista maqalka ee ilmahaaga.
- Da'da lagu bilaabay wax-ka-qabadka, inta uu leekaa wax-ka-qabadku, iyo tayada wax-ka-qabadka la bixiyay.
- Xaalado caafimaad oo kale oo laga yaabo in ilmahaagu qabo.

Ilmahayga iyo Qoyskaygu ma Baran Doonaan Luqadda Dhegoolaha ee Calaamadaha ah?

- Ilmaha qaba lumis maqal oo daran waxay badanaa u baahan yihiin inay bartaan nooc ah luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah. Xiitaa marka ay isticmaalayaan qalab gargaar maqal, waxa laga yaabaa in aanay awoodin inay maqlaan dhamaan codadka hadalka. Taa macnaheedu ma aha in caruurta qabta lumis maqal oo daran ama si weyn u daran aanay waligood baran doonin inay hadlaan. Macnaheedu waxa weeye waxay u baahan karaan inay siyaabo kale oo aan ahayn maqlid u helaan warka ku jira hadalka iyo luqadda.
- Waxa kale oo laga yaabaa in caruurta qabta lumis maqal oo khafiif ah ay ka faa'iidaan barashada xoogaa ah nooc luqad dhegoole oo calaamado ah. Waxa jiri kara wakhtiyo sida wakhtiga dabaasha ama qubeyska, oo aan ilmahaagu xidhnayn qalab gargaar maqal, oo uu u baahdo inuu isgaadhsiiin sameeyo.
- Qoysaska qaarkood, gaar ahaan kuwa leh ugu yaraan hal waalid oo ah Dhegoole, waxa laga yaabaa inay doortaan inay luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah u isticmaalaan habka isgaadhsiiin ee koobaad ee ay kula xidhiidhaan ilmahooda.

Doorashada Hab Isgaadhsiiin

Isgaadhsiiin aad la yeelatid ilmahaaga waa muhiim. Ilmahaaga oo aad u jawaabtid oo aad ku dhiirigalisid inuu kuu jawaabo ayaa ah furaha korniinka luqadda ilmahaaga. Waxa jira siyaabo

badan oo ilmaha qaba lumis maqal iyo qoysaskoodu ku yeelan karaan isgaadhsiin. Hab kasta waxa uu u baahan yahay hawlgal ay sameeyaan qoyskaagu si ilmahaaga looga gargaaro inuu barto luqad.

Go'aamada ugu adag ee ku hor iman doona waxa ka mid ah doorashada hab isgaadhsiin oo aad ilmahaagu u sameysid. Waxa laga yaabaa in dad badani kuu sheegaan in habkoodu yahay ka ugu fiican. Waa inaad maskaxda ku haysid in aanuu jirin hab u fiican dhamaan caruurta. Waxa laga yaabaa in caruurta qaarkood ay u fiican tahay isku-jir ah dhawr hab. Sidoo kale waa inaad maskaxda ku haysid in go'aan kasta oo aad gaadhid aad beddelid kartid goor dambe haddii ilmahaagu aanuu u hormarin sidii aad u maleynaysay. Halkan waxa ku yaala dhawr wax oo aad ka fikiri kartid inta aad ku jirtid doorashada hab isgaadhsiin:

- Waa in go'aamadu ku saleysan yihiin fiirooyinkaaga ku saabsan baahiyaha ilmahaaga iyo qoyskaaga.
- Su'aalo weydii. La hadal dadka waaweyn ee dhegoolaha ah iyo kuwo dhego culus iyo qoysaska kale ee qaba caruur leh lumis maqal.
- Ka hadal, oo akhri oo intii aad ka heli kartid hel war ku saabsan dooroshooyinkaaga.
- La soco horumarka ilmahaaga oo doorashadaada hadba dib u qiimee mudo ka dib. Goor dambe ayaad beddeli kartaa go'aankaaga haddii habka aad dooratay aanuu u shaqeynaynin sidaa aad u maleynaysay.

Habka/hababka aad dooratid waa inay ilmahaaga u oggalaanayaan:

- Inuu isgaadhsiin la yeesho dhamaan qoyska (walaalo, ayeeyooyin/awooweyaal, edo/habaryar, adeer/abti, ilmo-adeer/ilmo-abti).
- Inuu xidhiidh la yeesho dhamaan xubnaha qoyska.
- Inuu ku istareexo sheekaysiyo macne leh.
- Inuu dareemo inuu ka tirsan yahay qoyska.
- Inuu garto waxa agagaarka ka socda.
- Inuu xukumi karo waxyaabaha ka jira deegaanka.
- Inuu muujiyo dareenkiisa.

- Inuu ka qaybgalo khiyaaliga iyo ciyaaraha.

Habab Isgaadhsiin

Dhawrka bog ee soo socda waxay si kooban u sharaxayaan qaar ka mid ah hababka isgaadhsiinta oo aad fiirin kartid ka hor inta aanad go'aan gaadhin. Maqal-yaqaankaaga ama Isu-duwahaaga Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordinator) (FRC) ayaa bixin kara war dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada wax-ka-qabashada goor hore ee laga yaabo in hab kasta loo heli karo. Warkan u isticmaal bar bilaabis ahaan.

MAQAL/HADAL(AUDITORY/ORAL):

- Habka maqal/hadal waxa uu isticmaalaa qalabka gargaarka maqalka iyo akhriska dibnaha si loo barto luqadda lagu hadlo.
- Akhriska dibnaha macnihiisu waxa weeye ilmahaagu waxa uu isticmaalaa maqal iyo arag labadaba si looga gargaaro inuu fahmo luqadda lagu hadlo.
- Waa in ilmahaagu xidho cod-weyneeye (qalab gargaar maqal ama qalab lagu rabiko gudaha dhegta (cochlear implant)) si uu luqadda ugu barto habkan.
- Qoysasku waxay bartaan inay isgaadhsiin la yeeshaan ilmahooda iyaga oo isticmaala luqadda lagu hadlo.
- Habkan lama isticmaalo luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah.

MAQAL/FAL (AUDITORY/VERBAL):

- Habka maqal/fal waxa uu u eg yahay habka maqal/hadal, laakiin lama isticmaalo akhriska dibnaha.
- Ilmahaaga waxa la barayaa inuu isticmaalo qalabkiisa gargaarka maqalka iyo farsamooyin dhegaysi isaga oo aan isku halaynaynin tilmaamo arag ah.
- Waa in ilmahaagu xidho cod-weyneeye (qalab gargaar maqal ama qalab lagu rabiko gudaha dhegta (cochlear implant)) si uu luqadda ugu barto habkan.
- Qoysasku waxay bartaan inay isgaadhsiin la yeeshaan ilmahooda iyaga oo isticmaala luqadda lagu hadlo.

- Habkan lama isticmaalo luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah.

LABA LUQADLE/LABA DHAQANLE (BILINGUAL/BICULTURAL) (AMERICAN SIGN LANGUAGE):

- Habka laba luqadle/laba dhaqanle waxa uu muhimadda siiyaa sidii ilmahaaga loo bari lahaa Luqadda Dhegoolaha ee Calaamadaha ah ee Maraykanka (American Sign Language) (ASL).
- ASL waa hab la isticmaalo jidhka, wajiga iyo gacmaha si isgaadhsiin luqadeed loo sameeyo.
- ASL waa luqad gaar ka ah Ingiriisiga. Ma laha qaab-dhiska weedhaha Ingiriisigu leeyihiin.
- Ingiriisiga waxa loo dhigaa sidii luqad labaad ahaan.
- Looma baahna in ilmahaagu xidho cod-weyneeye si uu isgaadhiin ugu sameeyo habkan.
- Beesha Dhegooluhu waxay habkan u isticmaalaan isgaadhsiinta.
- Xubnaha beesha Dhegooluhu waxay leeyihiin dhaqan xooggan oo iyaga u gaar ah.

HADALKA TILMAAMAN (CUED SPEECH):

- Hadalka tilmaaman waxa lagu isticmaalaa sideed qaab gacmood oo loo dhaweeyo afka oo u taagan codadka kala duwan ee luqadda lagu hadlo.
- Qaababka gacmuhu waxay u taagan yihiin codad ay dhib tahay in la kala garto marka kaliya la adeegsanayo akhriska dibnaha.
- Qaababka gacmaha, oo lagu lamaaneeyay akhriska dibnaha, waxay ilmahaaga siinayaan tilmaan arag ah oo uu ku fahmo luqadda lagu hadlo.
- Looma baahna cod-weyneysiin, inkasta oo lagu taliyo.
- Qoysasku waxay bartaan inay isgaadhsiin la yeeshaan ilmahooda iyaga oo isticmaalaya tilmaamo gacmeed marka ay hadlayaan.

ISGAADHSIINTA ISKU WAKHTI AH (SIMULTANEOUS COMMUNICATION):

- Habkani waxa uu ka kooban yahay hadlidda iyo sameynta calaamado u taagan isla ereyada lagu hadlay oo isku wakhti ah.

- Cod-weyneysiinta waa lagu taliyay, laakiin qasab ma ah in habkan lagu isticmaalo.
- Qoysku waxa uu bartaa hab ah luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah, sida Signing Exact English (SEE). SEE waxa loo qorsheeyay in lala isticmaalo hadalka si ilmaha looga gargaaro inuu fahmo oo isticmaalo luqadda.
- Signing Exact English waxay ka duwan tahay ASL. SEE waxay si sax ah ugu toosan tahay Ingiriisiga lagu hadlo.
- Hadafka habkan waa in la kobciyo farsamooyinka luqadda, dhegaysiga, iyo hadalka ee ilmahaaga.
- Qoysasku waxay bartaan inay isgaadhsiin la yeeshaan ilmahooda iyaga oo isticmaalaya luqadda koobaad ee guriga (Ingiriisi, Isbaanish, Ruush, iwm.). Qoysasku waxay isku mar isku daraan luqadda calaamadaha ah iyo luqadda hadal ah.

ISGAADHSIINTA ISKU-DARKA AH (TOTAL COMMUNICATION):

- Habka isgaadhsiinta ee isku-darka ah waxa la isku daraa dhawr hab.
- Qoysasku waxay bartaan sida loo isticmaalo luqadda lagu hadlo iyo xoogaa ah luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah, dhaqdhaqaajin, nuuxnuuxsiyo waji, higaadin faraha lagu sameeyo iyo jilis si isgaadhsiin loo sameeyo.
- Calaamadaha iyo hadalka badanaa wada-jir ayaa loo isticmaalaa. Marmarka qaarkood waxa loo isticmaala si gooni kala ah.
- Qasab ma ah in ilmahaagu isticmaalo cod-weyneysiin si uu isgaadhsiin ugu sameeyo habkan.
- Qoysasku waxay bartaan inay isgaadhsiin la yeeshaan ilmahooda iyaga oo isticmaalaya isku-jir ah luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah iyo luqadda hadalka ah.

QALABKA GARGAARKA MAQALKA IYO COD-WEYNEYSIINTA (AMPLIFICATION)

Qaybtan waxa ku yaala war ku saabsan qalabka gargaarka maqalka, qalabka lagu rakibo gudaha dhegta (cochlear implants), hababka FM, iyo qalabka dhegaysiga ee gargaarka leh ee kale. Maqal-yaqaankaaga ayaa awoodi doona inuu ku siiyo war dheeraad ah oo ku saabsan mid ka mid ah mawduucyadan haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

Qalabka Gargaarka Maqalka

SIDEE BAY QALABKA GARGAARKA DHEGAYSIGU U SHAQEYAAAN?

- Qalabka gargaarka maqalka ee caruurta yaryar waxa lagu fadhisa dhegta xaggeeda dambe. Waxa loo galiyaa qaab dhegeed (earmold) gala gudaha marinka dhegta (ear canal).
- Qaab dhegeedku waa gobol yar oo ah caag jilicsan oo laga sameeyay cabirka dhegta ilmahaaga. Waxay qalabka gargaarka maqalka ka caawisaa inuu meesha haysto.
- Qalabka gargaarka maqalka waxa qiyaasta lumista maqalka ilmahaaga ku toosiya maqal-yaqaankaaga.
- Qalabka gargaarka maqalku waxa uu sanqadha ku maqlaa ama ku soo qaadaa maykorofoon ka dibna waa uu weyneeyaa.
- Sanqadha ama codka waxa la mariyaa tuubo ama dhuun ku dhex jirta qaab dhegeedka ilaa dhegta ilmahaaga.

SIDEE BAA QALABKA GARGAARKA MAQALKU U CAAWIN KARAA ILMAHAYGA?

- Qalabka gargaarka maqalku waxa uu weyneeyaa dhamaan sanqadhaha ka jira deegaanka ama agagaarka. Waxa kuwaa ku jira hadalka iyo sanqadhaha kale, sida telefshanka, jalaska albaabka, faakiyuumka, iwm.
- Qalabka gargaarka maqalku waxa uu gargaar ka geysan karaa hagaajinta horumarka hadalka iyo luqadda ee ilmahaaga.

- Waxay gargaar ka geysan karaan hagaajinta falgalka uu ilmahaagu la yeelanayo qoyska iyo qayrkiisa.

WAA MAXAY WAXA GARGAARKA MAQALKU AANUU AWOODIN INUU SAMEEYO?

- Qalabka gargaarka maqalku ilmahaaga kama bogsiin karo lumista maqalka.
- Ilmahaaga kama gargaari karo inuu maqlo sanqadhaha ah firikuwensiyo aanuu maqli karin.
- Hadalka kaligii ma weyneysiin karo. Qalabka gargaarka maqalku waxa uu weyneysiiyaa dhamaan sanqadhaha, oo ay ku jiraan buuqa agagaarka ka jira.
- Sanqadha ama codka saafi kama dhigi karo haddii dhegtu tashuush galisay.

WAA MAXAY NOOCYADA KALA DUWAN EE QALABKA GARGAARKA MAQALKA?

Waxa jira moodeelo qalab gargaar maqal oo badan. Maqal-yaqaankaaga ayaa kaa gargaari doona inaad dooratid qalabka gargaarka maqal ee ugu fiican ilmahaaga.

- Caruurta yaryar waxa caadi ahaan loo galiyaa qalabka gargaarka maqalka ee dhegta dabadeeda (**BEHIND THE EAR**), **AMA (BTE)**.
- Qalabka gargaarka maqalka ee sii yar ee gudaha dhegta la galiyo (**IN THE EAR**) (**ITE**) laguma taliyo in loo galiyo ilmaha sii yar.
- Ilmaha qaarkood ee qaba lumis maqal oo ah tabinta lafta, ee aan xidhan karin qalabka gargaarka maqalka ee caadiga ah, waxa laga yaabaa in loo xidho QALAB GARGAAR MAQAL OO AH TABIN LAF (**BONE CONDUCTION HEARING AID**).

SABABAHA ILMAHA YARYAR LOOGU GALIYO QALAB GARGAAR MAQAL OO DHEGTA DABADEEDA AH (BTE):

- Qaab dhegeedka qalabka gargaarka maqalka ee dhegta dabadeeda la galiyo waxa laga sameeyaa alaab jilicsan. Way u raaco badan yihiin caruurta. Isla markaana si fudud uma jabin karaan caruurta si weyn u firfircoon.
- Qaab dhegeedka BTE si fudud ayaa loo beddeli karaa marka ilmahaagu sii karo. Qalabka gargaarka laftiisa looma baahna in la beddelo marka ilmahaagu sii koro.

- Qalabka BTE badanaa isku-haleyntiisu way badan tahay si fududna uma jabaan.
- Qalabka BTE si fudud ayaa loogu xidhi karaa hab FM ama qalab gargaar dhegaysi oo kale.
- Qalabka BTE iyo qaab dhegeedyada waxa lagu helaa midabyo kala duwan oo caruurta xiiso u leh. Waxa kale oo la socda qalab dheeraad ah oo si gaar ah loogu qorsheeyay caruurta.
- Albaabo baytari oo aan la furi karin ayaa lagu rakibi karaa qalabka BTE. Taasi waa muhiim sababta oo ah baytariyada qalabka gargaarku waa sun waxana ku sumoobi kara caruurta haddii ay liqaan.
- Daboolka loogu talagalay barta laga xukummo weynaanta codka ayaa lagu rakibi karaa qalabka BTE. Taasi waxay gargaar ka geysataa inaan si aan ku-talagal ahayn loo beddelo weynaanta codka.

Tiknooloojiyada Qalabka Gargaarka Maqalka

Waxa jira dhawr farsamo oo loo sameeyo qalabka gargaarka maqalka. Noocyada qalabka gargaarka maqalku waa:

Qalabka gargaarka maqalka ee caadiga ah (conventional hearing aids):

- Si elegtaroonig ah ayay u kordhiyaan xoogga sanqadha ama codka.
- Maqal-yaqaankaaga ayaa weynaanta codka saxa isaga oo isticmaalaya iskuruuuyo xukun oo dibadda qalabka ku yaala.

Qalabka gargaarka maqalka ee la booragaraamgareyn karo (programmable hearing aids):

- Si elegtaroonig ah ayay u kordhiyaan xoogga sanqadha ama codka.
- Maqal-yaqaankaaga ayaa weynaanta codka saxa isaga oo booragaraamgareynaya maykarojiib (microchip) ku jirta gudaha qalabka.
- Waxa laga yaabaa inuu leeyahay dhawr marin ama barnaamij oo loogu talagalay deegaanada maqal ee kala duwan.

- Waxa laga yaabaa inay la socoto fogaan-xukun (remote) si loo saxo ama loo geysto meesha la rabo.

Qalabka gargaarka maqalka ee dhijitalka ah (digital hearing aids):

- Si dhijital ah ayay u kordhiyaan xoogga sanqadha ama codka.
- Maqal-yaqaankaaga ayaa weynaanta codka saxa isaga oo isticmaalaya kombiyuutar.
- Barnaamijka qalabka gargaarka maqalka wax baa laga beddeli karaa si loogu aadiyo lumista maqalka ee ilmahaaga.
- Waxay qaylada iyo hadalka uga shaqeeyaan ama u shaandheeyaan hab gaar ah oo laga yaabo inuu ilmahaaga ka gargaarto fahamka hadalka.
- Waxa suurogal ah in wax laga beddelo mudo ka dib si loogu aadiyo maqalka ilmahaaga.

Qalabka gargaarka maqalka ee tabinta lafta (Bone conduction hearing aids):

- Qalabka gargaarka maqalka ee tabinta lafta waxa isticmaala caruurta qaarkood ee leh lumis maqal oo ah tabinta lafta ee aan qalitaan ahaan lagu sixi karin. Badanaa, caruurtaasi ma xidhan karaan qalabka gargaarka maqalka ee dhegta xaggeeda dambe (behind-the-ear) (BTE).
- Qalabka gargaarka maqalka waxay tabiyaan sandhaqa ama codka iyaga oo marinaya mawjad-sameeye lafeed (bone oscillator) (gariiriye) lagu fadhiisiyo lafta ka dambeysa dhegta.

Maxaa ka Mid ah Sifooyinka Muhiimka ah ee Qalabka Gargaarka Maqalka ee Ilmaha Yaryar iyo Socod-baradka?

- Waa in qalabka gargaarka maqalku leeyahay tamar ku filan in ilmahaagu maqlo codadka hadalka.
- Waa inuu leeyahay meelo laga doorto Direct Audio Input (DAI) iyo maykorofoon – telecoil (M-T). Doorashooyinkaasi waxay qalabka gargaarka maqalka u oggalaanayaan in lagu lamaaneeyo ama lagu xidho qalab dhegaysi oo kale, sida hababka FM.

- Waa inuu qalabku yahay mid isbeddel lagu sameyn karo si isbeddelo loogu sameeyo tayada, soo-saarka iyo korodhka codka. Taasi waxay maqal-yaqaanka u oggalaanaysa inuu isbeddelo ku sameeyo qalabka hadba marka war dheeraad ah laga ogaado maqalka ilmahaaga.
- Waa in qalabku leeyahay albaabo aan si fudud loo furi karin. Taasi waa muhiim sababta oo ah baytariyada qalabka gargaarka maqalka oo sun ah oo ilmahaaga waxyeelayn kara haddii uu liqo.
- Waa in qalabka gargaarka maqalku leeyahay maykarfoon sax ku ah baahiyaha dhegaysiga ee ilmahaaga.
 - **MAYKAROFOONADA HORE U JIHEYSAN (DIRECTIONAL MICROPHONES)** waxay sanqadhaha ka soo qaadaan xagga hore ee ilmahaaga.
 - **MAYKAROFOONADA DHINAC KASTA U JIHEYSAN (OMNI-DIRECTIONAL MICROPHONES)** waxay sanqadha ka soo qaadaan jiho kasta. Waxay waxtar u sii leeyihiin ilmaha dhaqdhaqaaq sameeya.
 - **MAYROFOONADA ISKU JIRA (MULTIPLE MICROPHONES)** waxay kuu oggalaanayaan inaad u kala beddelatid mayrofoon dhinac kasta u jiheysan iyo mid hore u jiheysan.
- Waa inuu leeyahay qaab dhegeedyo (earmolds) raaxo leh oo lagu sameeyay cabirka ilmaha.
 - Sababta oo ah ilmaha yar oo dhakhso u kora, waxa laga yaabaa in loo baahdo in la beddelo qaab dhegeedka 3-dii ilaa 6-dii bilood kasta.
 - Qaab dhegeedyadu waxay mudo sii dheer hayn doonaan caruurta sii weyn.
- Maqal-yaqaankaaga ayaa kaala hadli kara qalabka kale ee dheeraadka ku ah qalabka gargaarka maqalka ee ilmahaaga. Qalabka dheeraadka ah waxa ka mid noqon kara tijaabiyeyaal baytari, uumi-saareyaal (dehumidifiers), fadhi qalab gargaar maqal, qabatooyin xejinta loogu talagalay iyo daboolo ilaaliya barta laga xukumo weynaanta codka.

Waa Maxay Habka Lagu Helo Qalab Gargaar Maqal?

Habka loogu galinayo ilmahaaga qalab gargaar maqal waxay qaadan doontaa dhawr todobaad. Waxa laga yaabaa in taasi u eg tahay wakhti dheer, laakiin waa in marka hore dhawr talaabo la qaado.

1. Waa in dhakhtarkaagu aqbalaad ama “oggalaansho caafimaad” ka helo dhakhtarka dhegaha, sanko iyo cunaha si uu ilmahaagu ugu xidho qalab gargaar maqal. Oggalaanshaha caafimaad waxa raba sharciga.
2. Maqal-yaqaanku waxa uu sawiro ka sameyn karaa qaabka dhegaha ilmahaaga. Sawiradaasi waxa loo isticmaali doonaa in laga sameeyo qaab dhegeedyo loo galiyo ilmahaaga.
3. Waa ilmahaagu leeyahay cabir gaar ah oo la yidhaahdo RECD (Real Ear to Coupler Difference) oo la sameeyo isaga oo xidhan qaab dhegeedka. Cabirka RECD ee ilmahaaga waxa uu maqal-yaqaanka ka gargaaraa inuu heer sax ah ku hagaajiyo qalabka gargaarka maqalka ee ilmaha. Waa in cabirka RECD la sameeyo ka hor ama isla wakhtiga ilmahaaga loo galinayo qalabka gargaarka maqalka.
4. Marmarka qaarkood, waxa laga yaabaa in ilmahaagu haysto oggalaansho caafimaad iyo qaab dhegeedyo, laakiin aad wali sugtid maalgalin ama lacag loogu iibiyo qalabka gargaarka maqalka. Marka ay jiraan xaaladaha oo kale waxa laga yaabaa in maqal-yaqaanku ilmahaaga u sii galiyo qalab gargaar maqal oo “dayn” ah inta lagu jiro mudada sugitaanka. Taa sababta loo sameynayo waxa weeye iyada oo ay muhiim tahay in ilmahaagu sida ugu dhakhsaha badan u bilaabo xidhashada cod-weyneeyahaa.

Talooyin ku Saabsan Sida Ilmaha Yaryar Aanuu Uga Dhicin Qalabka Gargaarka Maqalka

Waxa dhib noqon karta sida ilmahaaga yar u xidhaan lahaa qalabka gargaarka maqalka, gaar ahaan marka ugu horeysa. Hadba marka ilmahaagu sii barto isticmaalka qalabka gargaarka maqalka, oo uu barto in maqalkiisu sii fiicnaado marka uu xidhan yahay, waxa u sii fududaan doonta xidhashada. Halkan waxa ku yaala dhawr talo oo gargaar laga heli karo:

- Waa inaad xukun u lahaatid goorta iyo meesha uu ilmahaagu ku xidhanayo qalabka gargaarka maqalka. U hubso inaad ilmahaaga bartid in kaliya dadka waaweyn loo oggol yahay inay ka furaan qalabka gargaarka maqalka.
- Sii ilmahaaga dhiirigalin ku saabsan xidhashada qalabka gargaarka maqalka. Hayso abaalmarin, sida caruur-ciyaarsiis ama ciyaar gaar ah oo ilmahaaga aad siin doontid kaliya marka uu xidhan yahay qalabka gargaarka maqalka.
- Gacmaha yaryari waxay jecel yihiin inay soo jiidaan qalabka gargaarka maqalka. Waxyaabaha sida Huggie Aids, qabatooyin, koofiyado iyo maro lagu xidho wareegga madaxa ayaa gargaar ka geysan kara in qalabka gargaarka maqalku aanuu dhicin. Maqal-yaqaankaaga ayaa kaa gargaari kara doorashada wax u shaqeynaya ilmahaaga.
- Marmarka qaarkood waxa dhib ah sidii aad qaab dhegeedka (earmold) u galin lahayd dhegta ilmahaaga. Adiga oo isticmaala labeen gaar ah iyo farsamo fiican oo aad yeelatid ayaa ku gargaari kara. Maqal-yaqaankaaga ayaa ku bari kara farsamo sax ah oo kaa gargaari karta inaad heshid labeen gaar ah. **(Isticmaal labeen ku saleysan biyo. Ha isticmaalin Vaseline.)**
- Tijaabi in ilmahaagu xidho qalabka gargaarka maqalka markasta oo uu soo jeedo. Taasi waxay keenaysaa in maqlidda sanqadhu ka mid noqoto nolol maalmeedkiisa. Waxa laga yaabaa in loo baahdo inaad ku bilawdid wakhtiyada gaaban oo ah xidhnaansho ka dibna aad sii dheeraysid wakhtiyada uu xidhan yahay qalabka.

Dhibaatooyinka Aad Kala Kulmi Kartid Qalabka Gargaarka Maqalka ee Ilmahaaga

U hubso inaad la hadashid maqal-yaqaankaaga haddii ilmahaagu uu leeyahay mid ka mid ah dhibaatooyinka hoos ku qoran, ama haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan qalabka gargaarka maqalka ee ilmahaaga.

WAR-CELIN

War-celinta qalabku waa sanqadh dheer. Ka hor inta aanad hoos u gaabin weynaanta codka si aad u xukuntid war-celinta, u hubso inaad la hadashid maqal-yaqaankaaga. Waxa loo baahan yahay in qalabka gargaarka maqalka la geeyo weynaan cod oo gaar ah si qalabku sida ugu fiican ugu shaqeeyo ilmahaaga. La hadal maqal-yaqaankaaga haddii ay jiraan

dhibaatooyin ah xagga war-celinta. Sababaha keenaya qaylada war-celinta waxa ka mid noqon kara:

- Qaab dhegeed aan si fiican loo wada galin dhegta ilmahaaga.
- Qaab dhegeed si xun u leeg dhegta ilmahaaga, ama ilmahaagu ka weynaaday.
- Qaab dhegeed, tuubo ama qabato dheg oo waxyeelooday.
- Koofiyada ma buste daboolay qalabka gargaarka maqalka iyo maykarfoonka (war-celintu waxay joogsan doontaa marka aad ka qaadid koofiyadda ama bustaha).
- Qalab gargaar maqal oo waxyeeloobay.
- Qaab dhegeed ama marinka dhegta oo uu gufeeyay dhukay ama dheecaan uu keenay caabuq dhegta ku dhacay.

MEELO XANUUN LEH

Marmarka qaarkood qaab dhegeedyada cusub waxay leeyihiin oogo aan isku sinayn ama xanaf taasoo keeni karta meel cas ama xanuun leh oo ah dhegta ilmahaaga. Haddii taasi dhacdo, maqal-yaqaankaaga ayaa badanaa soofeyn kara oo simi kara qaab dhegeedka. Ka eeg meelo cas dhegta ilmahaaga marka loo xidho qaab dhegeedyo cusub. Waxa laga yaabaa in sababta uu ilmahaagu u diidan yahay inuu xidho qalabkiisa gargaarka maqalka ay tahay meel xanuun leh oo ah dhegta.

CAABUQA DHEGAHA

Haddii ilmahaagu qabo caabuq dhegaha ah, waxa laga yaabaa in aanuu rabin inuu xidho qalabkiisa gargaarka maqalka sababta oo ah dhegaha oo xanuunaya. Haddii aad u maleynaysid in ilmahaagu qabo caabuq dhego, la hadal dhakhtarka ilmahaaga ama maqal-yaqaanka. Waxa laga yaabaa inay ku taliyaan in ilmahaaga laga dhaaf xidhashada qalabka gargaarka maqalka ilaa uu ka bogsanayo caabuqa. Haddii dhegaha ilmahaaga uu dheecaan ka socdo, ka saar qalabka gargaarka maqalka oo ka dhaaf ilaa caabuqa dheghu ka tagayo.

COD-WEYNEYSIINTA XAD-DHAAFKA AH

Cod-weyneysiinta xadka dhaafka ah macnaheedu waxa weeye qalabka gargaarka maqalka oo aad u cod weyn. Waa in maqal-yaqaankaagu isticmaalo hab loo yaqaano cabirka dhegaha ee dhabta ah (real ear measures) si loo helo cabirada ku haboon ilmahaaga. Haddii ilmahaagu uu si joogto ah qalabka gargaarka maqalka uga soo jiido dhegihiisa, ama libiqsanayo in ka badan

intii caadiga ahayd marka uu xidhan yahay qalabkiisa gargaarka maqalka, waxa laga yaabaa in qalabku si weyn u qaylo badan yahay. Waa in codadka qaylada badan ay weyn yihiin marka la gashan yahay qalabka gargaarka maqalka, laakiin waa inaan codadka aad u weyni ilmahaaga u keenin raaxo-daro. La hadal maqal-yaqaankaaga haddii aad u maleynaysid in cod weyneysiintiisu tahay xad-dhaaf.

Qalabka Lagu Rakibo Gudaha Dhegta (Cochlear Implants), Hababka FM iyo Qalabka Dhegaysiga ee Gargaarka Leh ee Kale

QALABKA LAGU RAKIBO GUDAHA DHEGTA

Waxa laga yaabaa inaad maqashay ama meel ka akhriday war ku saabsan qalabka lagu rakibo gudaha dhegta. Haddii aad xiisanaysid qalabka lagu rakibo gudaha dhegta oo ilmahaaga lagu rakibo, la hadal maqal-yaqaankaaga ama dhakhtarka dhegta, sanko iyo cunaha (ENT doctor). Waxay kuu sheegi karaan haddii qalabka lagu rakibo gudaha dhegta uu ilmahaagu gargaar ka heli karo iyo in kale. Waxa kale oo ay kaa gargaari karaan inaad heshid barnaamij ah qalabka lagu rakibo gudaha dhegta oo agtaada ka jira. Halkan waxa ku yaala dhawr qodob oo ku saabsan qalabka lagu rakibo gudaha dhegta:

- Qalabka lagu rakibo gudaha dhegaha inta qalitaan la sameeyo ayaa lagu rakibaa dhegta gudaha ee ilmahaaga.
- Waa in ilmahaagu leeyahay lumis maqal oo weyn oo daran ilaa mid si weyn u daran si looga fiirsado in lagu rakibo qalabka lagu rakibo gudaha dhegta.
- Dhamaan caruurta laguma raki karo qalabka lagu rakibo gudaha dhegta.
- Waa in ilmahaagu ugu yaraan jiraa hal sanno.
- Qalitaanka dhegta lagu sameeyo si qalabka maqalka loogu rakibo gudaha dhegta waxa uu baabi'inaya maqalka ku hadhsanaa dhegta.
- Qalabka lagu rakibo gudaha dhegta ma saxayo lumista maqalka. Waxa uu dhinac marayaa jidka maqalka (dhegta dibadda, dhegta dhexe, dhegta gudaha). Waxa uu toos u dareen galiyaa dareemaha maqalka. Ka dib maskaxda ayaa barata sida dareenka korontada ah loogu tarjumo hadal.

- Marka daweyn la-sii-socod ah oo haboon la sameeyo waxa qalabka lagu rakibo gudaha dhegtu uu caruurta leh lumis maqal oo daran ama si weyn u daran ka gargaari karaa inuu fiicnaado horumarkooda hadalka iyo farsamooyinkooda luqadda.
- Qalabka lagu rakibo gudaha dhegta waxa uu ku “daydaa” maqalka hadalka. Ilmahaagu waxa uu u baahan doonaa tababar si codadku macne ugu sameeyaan. Taa waxa la yidhaahdaa dhaqan-celin maqal (aural rehabilitation).

HABABKA FM

Hababka FM waxay weyneysiiyaan hadalka iyaga oo aan sanqadhaha ka jira agagaarka xoojin. Taasi waxay ilmahaagu u oggolaanaysaa in maqalka codka qofka hadlaya u sii fiicnaado. Taasi waxay gaar ahaan faa’iido leedahay marka buuq badan ka jiro agagaarka, sida dugsiga ama garoonka ciyaaraha. Haddii aad u maleynaysid in habka FM uu gargaari karo ilmahaaga, la hadal maqal-yaqaankaaga. Maqal-yaqaankaagu waxa uu ilmahaaga u raki doonaa habka FM ama waxa uu kuu gudbin doonaa maqal-yaqaan taa sameyn kara. Halkan waxa ku yaalaa dhawr qodob oo ku saabsan hababka FM:

- Hal qof (waalidka, daryeelaha, ama macallinka) ayaa xidha maykarofoon iyo tabiye (transmitter).
- Ilmahaagu waxa uu xidhanayaa qabte (receiver).
- Maykarofoonku waxa uu qabanayaa codka qofka hadlaya.
- Codadka hadalka waxa loo tabiyaa dhegaha ilmahaaga iyaga oo ah mawjado raadyo.
- Hababka FM gooni ayaa loo isticmaal karaa, iyada oo la isticmaalayo qalabka gargaarka maqalka, ama qalab lagu rakibo gudaha dhegta.
- Hababka FM waxay faa’iido ku leeyihiin fasalka ama guriga.
- Hababka FM waxa la isticmaalaa marka aad doonaysid in ilmahaagu awoodo inuu codka qofka hadlaya ka dhex maqlo buuqa ka jira agagaarka.

QALABKA DHEGAYSI EE KALE

Qoraalka Shaashadda (closed Captioning)

Qalabka waxa lagu xidhi karaa telefishanka ama waxa lagu sameyn karaa telefishanka. Waxa uu ereyada lagu hadlayo u beddelaa ereyo qoran oo ku qorma xagga hoose ee shaashadda telefishanka.

TTY

TTY waxay u taagan tahay “teletypewriter.” Waxa kale oo loogu yeedhaa TDD (Telecommunications Device for the Deaf). Qalabka TTY waxa uu qofka qaba lumis maqal u oggalaada inuu teleefon isticmaalo isaga oo ku garaacaya ereyada halka uu ka hadli lahaa. Qofka isticmaala TTY waxa uu toos u wici karaa qof kale oo haysta TTY, ama waxa uu isticmaali karaa adeegga gudbinta si uu u waco qof kale oo aan haysan TTY.

Cod-weyneeye Teleefon (Telephone Amplifier)

Qalabkani waxa weyneeyaa codka teleefonka. Waxa lala isticmaali karaa qalabka gargaarka maqalka ama waxa la isticmaali karaa la'aanta qalab gargaar maqal.

Qalabka Ogeysiinta (Alerting Devices)

Qalabkani waxa uu ilmahaaga ogeysiin karaa codadka sida codka jalaska albaabka ama teleefon dhacaya. Waxay bixin karaan ogeysiis la arki karo, iftiin bigbigle, ogeysiis gariir ah, sida qabte jeebka la gashado oo gariira. Qalabka ugu caamsan ee la isticmaalo waxa ka mid ah saacadaha ogeysiiska, qalabka digniinta qiiqa, garaaceyaasha albaabada, gariireyaasha sariirta iyo qalab iftiin bixiya oo teleefonka lagu rakibo.

XUQUUQDA ILMAHAAGA IYO XUQUUQDAADA WAALID AHAAN

Qaybtani waxay ku siinaysaa war ku saabsan xuquuqda sharci ee adiga iyo ilmahaaga. Waxa sidoo kale aad wax ka baran doontaa siyaabo aad ilmahaaga kaga gargaartid inuu helo adeegyada uu u baahan yahay.

Sharciga iyo Xuquuqdaada

Waxa jira sharciyo adiga iyo ilmahaaga u ballanqaadaya xuquuq. Waxa jira saddex qoraal oo yaryar oo ku jira jeebka dambe ee qaybtan oo ay ku qoran yihiin war ku saabsan xuquuqdaada:

- ***Tilmaan-bixiye Qoys oo ku Saabsan Adeegyada Wax-ka-qabashada Goor Hore Gudaha Gobolka Washington (A Family's Guide to Early Intervention Services in Washington State)***
- ***Kala-guur: Wakhti Isbeddel – Korista: Maxaa dhaca marka ilmahaagu ku soo dhawaado saddex jir? (Transition: A Time of Change – Growing Up: What happens as your child approaches three?)***
- ***Ilmaha Yaryar iyo Socod-baradka Dhegoole ah ama Dhego Culus (Infants and Toddlers who are Deaf or Hard of Hearing)***

Bogga soo socda waxa ku yaala koobitaanada warka ku jira qoraal yar oo kasta.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa gargaaro fahmidda warka ku jira qoraalada yaryar, ama haddii aad su'aalo qabtid, la hadal Isu-duwaha Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordinator) (FRC). Haddii aanad aqoonin qofka ah isu-duwahaaga (FRC), waxa aad wici karta Healthy Mothers Healthy Babies si aad u ogaatid teleefonkuna waa: (800) 322-2588.

TILMAAN-BIXIYE QOYS OO KU SAABSAN ADEEGYADA WAX-KA-QABASHADA GOOR HORE GUDAHA GOBOLKA WASHINGTON.

Qoraalkan yar waxa ku yaala war ku saabsan adeegyo loogu talagalay caruurta min dhalasho ilaa saddex jir. Waxa aad wax ka baran doontaa:

- Xeerka Waxbarashada ee Dadka Qaba Naafo (Individuals With Disabilities Education Act) (IDEA).
- Xuquuqdaada hoos timaada IDEA.
- U-banaanaanta wax-ka-qabashada goor hore gudaha Gobolka Washington.
- Adeegyada ka mid noqon kara wax-ka-qabashada goor hore.
- Qorshaha Adeegga Qoyska ee Gaarka ah (Individualized Family Service Plan) (IFSP).
- War ku saabsan sida loola xidhiidho hay'adaha bixin kara gargaar ama war.

KALA-GUUR: WAKHTI ISBEDDEL – KORISTA: MAXAA DHACA MARKA ILMAHAAGU KU SOO DHAWAADO SADDEX JIR?

Wax-ka-qabashada goor hore waxay dhamaataa marka ilmahaagu gaadho da'da saddex jir. Qoraalkan yar waxa ku yaala war ku saabsan waxa dhaca marka ilmahaagu ku soo dhawaado da'da saddex jir iyo ka-guurista adeegyada wax-ka-qabashada goor hore. Waxa ku yaala war ku saabsan:

- Waxa kala-guurku yahay.
- Sida loo bilaabo qorsheynta kala-guurka.
- Sida loo soo saaro qorshe kala-guur.
- Adeegyada laga yaabo in loo heli karo ilmahaaga ka dib marka wax-ka-qabashada goor hore dhamaato.
- Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiga (Individualized Education Program) (IEP).
- Sida aad ilmahaaga iyo qoyskaaga uga gargaari kartid inay sameeyaan kala-guur aan turxaan lahayn.
- War ku saabsan sida loola xidhiidho hay'adaha bixin kara gargaar ama war.

ILMAHA YARYAR IYO SOCOD-BARADKA DHEGOOLE AH AMA DHEGO CULUS

Qoraalkan yari waxa uu kaa gargaari doonaa inaad jawaabo u heshid su'aalaha badan ee laga yaabo inaad qabtid marka ugu horeysa ee aad ogaatid in ilmahaagu qabo lumis maqal. Waxa uu bixinayaa hordhac ku saabsan kala-doorashooyinka loo heli karo ilmahaaga iyo qoyskaaga. Waxa ku yaala war ku saabsan:

- Meesha laga bilaabo raadinta jawaabo.
- Ikhtiyaarka Adeegyada Wax-ka-qabashada iyo Daweynada.
- Hababka Isgaadhsiinta.

Wajibbaadkaaga Waalid Ahaan

Sida aad adiguba xuquuq u leedahay maka aad waalid u tahay ilmo leh baahiyo gaar ah, waxa jira siyaabo badan oo aad u hubin kartid in xuquuqda ilmahaaga la ixtiraamo oo la badbaadiyo.

Talooyinkani waxay ku siin karaan gargaar:

XUQUUQDAADA IYO XUQUUQDA ILMAHAAGA KA BARO INTII AAD KARTID

Marka aad wax ka sii ogaatid xuquuqda ilmahaaga ee hoos timaada xeerka federalka, waxa sii fiicnaanaya inaad u habsatid in dugsiga ilmahaagu ka soo baxayo xurmeynta xuquuqdiisa. Haddii aad wax su'aalo ka qabtid xuquuqdaada waalid ahaan, weydii Isu-duwaha Adeegyada Qoyska, dugsiga ama hay'ad waxbarasho.

ISKAASHI LA SAMEE DUGSIGA BARBARDKA EE ILMAHAAGA, DUGSIGA AMA HAY'ADDA WAXBARASHO

Sababta oo ah adiga oo qof kasta ka yaqaanaa ilmahaaga, waxa aad xubin muhiim ka tahay kooxda ay shaqadeedu tahay inay ilmahaaga ka gargaaraan inuu helo waxbarashada ugu fiican ee suurogal ah. Fikradahaagu waxay waxtar fiican u leeyihiin bareyaasha iyo xirfadleyda kale ee la shaqeeya ilmahaaga.

WAA INAAD FAHAMTID BARNAMIJKA KU JIRA QORSHAHA IFSP AMA IEP EE ILMAHAAGA

Su'aalo weydii ilaa aad ka hubtid inaad fahamtay. Ha saxeexin IFSP ama IEP ilaa aad ka hubtid inaad ka fahamtay dhamaantii.

LA SOCO HORUMARKA ILMAHAAGA

Haddii ilmahaagu aanuu u hormarin sidii aad u maleynaysay inuu u hormarayo, la hadal macallimiintiisa ama adeeg-bixiyeyaasha. Waxa aad xaq u leedahay inaad weydiisatid in dib-u-fiirn lagu sameeyo barnamijka waxbarasho ee ilmahaaga wakhti kasta.

DIIWAAN SAMEYSO

Sannad kasta, sameyso buug aad ku qortid su'aalaha ama faalooyinka ku saabsan horumarka ilmahaaga ama barnaamijka waxbarasho. Wixii muhiim ah qoro markasta oo aad la kulantid shaqaalaha, aad telefoonka kula hadashid, ama aad fariimo u dirtid macallimiinta ama shaqaalaha kale. Qor taariikhaha, wakhtiyada, wixii dhacay, iyo magacyada dadka aad la xidhiidhay. Qoraaladaasi waxay xusuusin waxtar leh u noqon karaan adiga iyo bareyaasha ilmahaaga.

LA HADAL DUGSIGA AMA HAY'ADDA ILMAHAAGA MARKA AAD QABTID WALAAC

Waxa muhiim ah inaad u habsatid in xirfadleyda la shaqeysa ilmahaaga ay fahmaan walaacaaga. Badanaa, dhibaatooyinka si fudud ayaa loo xalin karaa marka la ogaado walaacaaga.

Sheekada Olivia

Waxa qoray Bryan iyo Heather Milliren

Waxay ahayd galab gu' ah oo iftiin badan oo qorraxduna jirtay markii aannu si xiiso badan baabuurka u soo raacnay xarunta maqalka ee jaamacadda si aannu u maqalno war aannu si weyn u dhawraynay. Imminka ayaanu garanay sida aanaanu diyaar ugu ahayn waxa dhegahayagu maqli doonaan. Olivia waxay ahayd ilmahayaga kali ah, waxana ay jirtay 16 bilood. Sida waalidka cusub oo dhan, waxay Olivia udub-dhexaad u ahayd fikradahayaga iyo walwalkayaga. Sannad ayaa laga joogaa markii aannu si farxad badan leh u tagtay xafladda guga ee weynayd ee magaaladayada. Olivia, oo markaa jirtay shan bilood, waxay ku fadhiday kursigeeda lagu riixo iyada oo daawanaysay baabuurta, fanaaniinta majaanilada, iyo dad cunayay nacnacca suufka ah. Meel fog ayaa waxa ka soo yeedhay baabuurka dab-damiska, kaasoo ay u riyaaqeen socod-baradku kana naxeen nuunuugu. Markii baabuurka dab-damisku na dhaafayay waxa uu darawalku yeedhiyay hoonka. Halka nuunuuga kale ka dhaqaaqeen ama la-yaab la ooyeen, Olivia iyada oo aan xaaleyn ayay iska fadhiday, siina wadatay ciyaartii ay ku ciyaaraysay alaabteedii ciyaarta. Waxa la yaab leh annaga oo wakhti aan sii fogeyn muuqaal kan la mid ah ka daawanay filimka la yidhaahdo "Mr. Holland's Opus." Waxba yaanan sheekada kugu daalin e, dhacdadani waxay noo keentay su'aalo badan oo aannu isweydiinay iyo booqashooyin badan oo aannu dhakhtarka ugu tagtay. Sannad ka dib iyo annaga oo ka soo daalnay daahid ballamo, u-gudbinno iyo ballamo ku-celcelis ah, waxa aannu fadhiisanay xarunta maqalka ee jaamacadda annaga oo si xiiso leh u sugayna jawaab. Waxay jawaabtu noqon doonto wax fikrad ah kama aannu haysan. Laakiin markii dhakhtarku noo sheegay in Olivia ay labada dhegoodba ka qabto lumis maqal oo "daran ilaa mid si weyn u sii daran," waxa meesha nagu qabsaday fajac iyo amakaag. Annaga oo aamusan ayaanu meeshii ka tagtay. Illimo ayaa dhakhso wax ka yar dib naga yimi. Murugo ayaa dhakhso noo gashay, iyo waliba dareen xooggan oo ah "Maxaa ku xigi doonaa?"

Imminka ku-dhawaad todoba sannadood ayaa laga jooga waxana na soo maray waayo badan. Maalmihii hore ee lahaa murugada iyo shakiga waxa beddelay farxad iyo mahadnqad. Markii hore, waxa aannu ogeyn in loo baahnaa in aannu wax ka qabano wakhtigii lumay, oo ku dhawaa 17 bilood. Waxa aannu is qornay wax-ka-qabasho goor hore oo kasta oo suurogal ahayd: dhaqancelin maqal, kooxo ciyaareed min dhalasho ilaa saddex jir, la-tacaalis hadal (speech therapy), iwm. Waxa aannu bilaabnay in aannu la shaqeyno maqal-yaqaan degmada ah si Olivia loogu galiyo qalab gargaar maqal oo dhijital ah, waxana aannu is qornay fasal ah luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah. Olivia si samir leh ayay u xamishay barnaamijkeeda cusub ee ahaa shan ilaa todoba ballan todobaadkii. Natiijooyin la-

yaab leh ayaanu isla markiiba aragnay—Olivia luqaddeedi way fiday! Xiitaa waxay u jawaabaysay la-tacaalaha hadalka (speech therapist) iyada oo baratay toban calaamadood oo cusub mudo ka yar shan daqiiqadood. Olivia waxay diyaar u ahayd inay wax barato waxana ay u baahnayd in aannu waxbarashada la dhex galno. Waxay taasi *annaga* laftayada noo noqotay daweyntii ugu fiicnayd.

Isticmaalka qalabka gargaarka maqalka ee Olivia si weyn ayuu isu beddelay mudo ka dib. Hadafkii ugu horeeyay ee maqal-yaqaanka waxa uu ahaa in Olivia xidhato qalabkeeda gargaarka maqalka mudo ah 10 daqiiqadood, saddex jeer maalintii. Nasiib ayaanu lahayn haddii ay xidhnaato 10 sekan! Ka dib 17 bilood oo ah ahaa nolol degan oo aanay arag qalabka gargaarka maqalka, Olivia may rabin inay qalabkaa xidhato. Kama aannu dhaafin waxana aannu si tartiib ah wakhtiga xidhnaanshaha u gaadhsiinay ilaa 10 daqiiqadood. Ka dibna waxa ku xigay 15 daqiiqadood, 30 daqiiqadood, iyo saacad. Waxana marmar nagu dhacay dib-u-dhac sababta oo ahayd xanuun, iwm., laakiin waanu ku sii wadnay. Haa, arrintani marmarka qaarkood waxay lahayd niyad-jab, laakiin dhawr bilood ka dib waxay Olivia wakhtiga ay soo jeedo intiisa badan xidhnaan jirtay qalabkeeda gargaarka maqalka. Hadafkayagu waxa uu ahaa, walina uu yahay, in la dareen-kiciyo dareemeyaasha maqalka ee Olivia lagana gargaaro inay hesho sanqadha intii suurogal ah iyada oo isticmaalaysa hadhaaga maqalkeeda. Waxa aannu og nahay inay maalin dooran karto in aanay xidhan, laakiin ilaa wakhtigaa laga gaadhayo, waxa aannu Olivia ku dhiirigalinaa inay sanqadha ku hesho qalabkeeda gargaarka maqalka.

Sidoo kale awoodda luqadda dhegoolaha ee calaamadaha ah ee Olivia si dhakhso ah ayay u kortay markii la gashay fasaladeeda cusub. Imminka iyada ayaa nagaga dhakhso badan oo nagaga saxsansen sameynta calaamadaha. Marmar badan ayay na bartaa calaamado cusub iyada oo farxad la dhoola-cadeynaysa. Waa la-yaab leh sida Olivia ula qabsanayso American Sign Language, Signed Exact English ama Pigeon Signed English. Olivia goor hore ayay baratay inay akhriso dibnaha, “popcorn” (salool ama daange) ayaa ahaa ereygii ugu horeeyay ee ay dibnaha ka akhriso. Waxa kale oo ay si weyn ugu dedaashaa inay isticmaasho luqadda lagu hadlo. Waa dhif inay dadka kale ogeysiiso dhibka ka haysta codadka firikuwensi jilicsan sida “s,” “f,” iyo “th.” Badanaa waxa nalagu amaanaa sida wacan ee ay u hadasho, laakiin Olivia ayaa iska leh amaanta inteeda badan. Dhabtii waa qof shaqo badan! Waxa aannu si weyn ugu mahadcelinyaa la-tacaaleyaasha iyo bareyaasha leh taageero, jajabni iyo aqoon fiican.

Lumista maqalka ee Oivia waxa uu qoyskayaga oo dhan u daahfuray caalam dhan oo cusub. Waxa aannu baranaynaa luqad cusub, oo aannu xidhiidh cusub la sameynaynaa dad aanaanu si kale u baranayn, oo aannu wax ku dhegaysanaynaa dhegaha iyo waliba indhaha

iyo qalbiga. Markasta arrintu sidaa uma fududeyn, waxana jiray wakhtiyo dhib lahaa. Markii aannu ogaanay in beeshayada yar ee miyiga ahi ay ku yar yihiin fursada waxbarasho oo ku haboon Olivia, waa aannu guurnay si aannu ugu taageerno barnaamij waxbarasho oo loogu talagalay dhegoolaha iyo kuwa dhego culus. Taa macnaheedu wuxu noqday in aannu ka tagno gurigayagii ugu horeeyay, kiniisaddii qoyskayaga, iyo safar dheeraad ah oo aannu shaqada ku tagno. Waxa macnaheedu noqday in aannu degno degmo kale oo aannu isku dayno hab aannu ku helno oo kula kulanno beesha baahiyaha gaarka ah leh ee degmadayada. Intii aannu hawshan ku jirnay, waxa aannu helnay taageero weyn. Qaar badan oo ka tirsan qoyskayaga iyo qaar kale oo badan oo ka tirsan kiniisadayada ayaa qaatay fasallo ah luqadaha dhegoolaha ee calaamadaha ah si ay isgaadhsiin ula sameeyaan Olivia. Waxa aannu helnay jaceyl iyo dhiirigalin weyn intii aannu baranaynay arrimaha aan sahlamayn ee la xidhiidha sida loo koriyo ilmo qaba lumis maqal, iyo waliba caruurta ay walaalaha yihiin ee ka yar. Annaguna markayaga, waxa aannu taageero iyo dhiirigalin siinaa waalid kale oo korinaya ilmo qaba lumis maqal ama leh baahi gaar ah oo kale.

Waxa aannu gaadhnay horumar weyn mudo ku dhow todoba sannadood. Waxa si fiican noo dhiirigaliyay wicitaan teleefon oo aannu ka helnay isku-duwaha Xidhiidhka Waalidka ee degmadayada maalmihii ugu horeeyay ee ku xigay guggii ciladda na loo sheegay. Annaga oo murugeysan ayaanu dhegeysanay markii ay nala wadaagtay sheekadeedii ku saabsanayd go'aan-gaadhista ay u sameysay inanteeda leh lumis maqal. Hadalkii ugu fiicnaa ee ay na tidhi maalintaa qorraxda badnayd ee ahayd Bishii Shanaad waxa uu ahaa, "Haddii aad gaadhid go'aan aan u shaqeynaynin qoyskiina, iska beddela!" Waana aannu yeelnay. Waxa aannu rabnay in aannu ogaano qalabka gargaar maqal ee ay tahay in aannu doorano, habka isgaadhsiin ee aannu qaadan lahayn, dugsiga ilmaha yaryar ee aannu tagi lahayn, dhakhtarka aannu u dooran lahayn Olivia iyo qoyskayaga. Go'aamadaasi waxay keeneen go'aamo kale sida beel kale oo aannu u guurno, barnaamijka dugsi ee ugu fiican oo aannu dooranayo, iyo in aannu u doodno qorshaha waxbarasho ee Olivia. Waxa aannu sameynay khaladaad, laakin waxa kale oo aannu la kulannay guul iyo abaalmarin weyn. Inkasta oo aannu markii hore damacnay in aannu Olivia u "sameyno" maqal oo aannu wax ka qabano 17-kii bilood ee ugu horeeyay nolosheeda ee ahaa bilaa sanqadh, waxa aannu si mahadnaq leh u oggalaanay nolosha aannu haysano. Taasina waa nolol aan su'aalaha dhamaantood loo haynin jawaab, oo mustaqbalku aannu wali sugnayn, laakiin raadintu xiiso badan tahay oo suurogalka horumarku weyn yahay.

ADEEGYO

Waxa jira adeegyo badan oo kaa gargaari kara inaad wax ka sii ogaatid ikhtiyaarada lumista maqalka iyo la-tacaalista. Waxa kaliya ee aannu soo qornay qaar ka mid ah adeegyada la heli karo. Maqal-yaqaankaaga ama Isu-duwahaaga Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordinator) ayaa sidoo kale kaa gargaari kara inaad heshid adeegyo iyo barnaamijyo dheeraad ah oo haqabtira baahiyahaaga.

Qaybtan waxa aad ku arki doontaa faahfaahinno ku saabsan:

- Sida loola xidhiidho Isu-duwahaaga Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordinator) (FRC).
- Barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore ee ku takhasusay la-shaqeynta caruurta qaba lumis maqal iyo qoysaskooda.
- Dugsiyada loogu talagalay caruurta qabta lumis maqal.
- Goobaha internetka iyo hay'adaha faa'iido leh.
- Maqal-yaqaanada qiimeeya ee la tacaala ilmaha yaryar iyo caruurta qaba lumis maqal.

La-xidhiidhista Isu-duwahaaga Adeegga Qoyska (Family Resources Coordinator)

La-xidhiidhista Isu-duwaha Adeegyada Qoysaska (Family Resources Coordinator) (FRC) ayaa ah talaabooyinka ugu horeeya ee la rabo inaad qaadid si aad u gargaartid ilmahaaga. Isu-duweyaasha Adeegga Qoyska waxa laga helaa degmo ama aag kasta. Isu-duwahaaga Adeegga Qoyska waxa uu qoyskaaga ka gargaari doonaa helista adeegyada wax-ka-qabashada goor hore ee ilmahaagu u baahan yahay.

Sida ugu dhakhsaha badan ee suurogal ah ula xidhiidh Isu-duwahaaga Adeegga Qoyska, haddii aanad sidaa hore u sameynin. Haddii aanad garanaynin Isu-duwahaaga Adeegga Qoyska, wac Healthy Mothers, Healthy Babies oo lambarkoodu yahay (800) 322-2588. Waxa lagu siin doonaa warka sida loola xidhiidho Isu-duwaha Adeegga Qoyska ee Koobaad ee ka jira degmada aad ku nooshahay. Waxa kale oo aad booqan kartaa rugta internetka ee WithinReach oo ah www.hmhbwa.org.

Barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore ee ku Takhasusay Lumista Maqalka

Liiska soo socda waxa ku jira barnaamijyada Wax-ka-qabashada Goor Hore ee ka jira Gobolka Washington ee ku takhasusay la-shaqeynta caruurta dhegoolaha ah ama dhego culus iyo qoysaskooda. Shaqaalaha barnaamijyadaasi waxay leeyihiin tababar gaar ah, waxana ay khubaro ku yihiin la-shaqeynta caruurta qaba lumis maqal. La hadal Isu-duwahaaga Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordinator) (FRC) haddii aad u baahan tahay in lagaa gargaaro la-xidhiidhista mid ka mid ah barnaamijyadaa. Waxa kale oo laga yaabaa in degmadaada ay ka jiraan barnaamijyo leh shaqaale si gaar ah loogu tababaray inay la shaqeeyaan caruurta qaba lumis maqal iyo qoysaskooda. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa Isu-duwahaaga Adeegyada Qoyska si aad u heshid liiska imminka ee barnaamijyada.

FAMILY CONVERSATIONS

- Waxa uu bixiyaa waxbarid ku saleysan guriga oo waalidka ka gargaara inay fahmaan awoodda iyo baahiyaha ilmahooda xagga isgaadhsiinta.
- Waxa uu waalidka ka gargaara inay bartaan siyaabo lagu taageero horumarka luqadda iyada oo la adeegsanayo dhegaysi, hadlid iyo calaamad-sameyn.
- Ilmaha, waalidka, walaalo, iyo qaraabadu waxay ka qaybgali karaan kooxo ciyaareed ah todobaadle, waxbaridda waalidka, fasalo ah Signing Exact English iyo kooxo taageero oo aan qaabeysnayn.
- Family Conversations waxa uu u adeegaa caruurta iyo qoysaskooda ku baahsan Galbeedka Washington ilaa da'da 3 jir.

Children's Hospital & Regional Medical Center (Cisbitaalka Caruurta iyo Xarunta Caafimaadka Gobolka)

(206) 987-5147 (cod) / (206) 987-2788 (TTY)

rugta internetka: <http://www.seattlechildrens.org/> dooro "our services" ka dibna "browse our services" oo dooro "Audiology" ama toos u tag http://www.seattlechildrens.org/our_services/clinical_services/audiology.asp

LISTEN AND TALK (DHEGAYSO OO HADAL)

- Waa barnaamij maqal iyo hadlid oo u adeega qoysaska ku nool Gobolka Washington.

- Waa in ilmahaagu isticmaalo qalab gargaar maqal ama qalab lagu rakibay gudaha dhegta (cochlear implant) si uu u galo barnaamijkan.
- Listen and Talk waxa uu qoysaska siiyaa kulanno la-talin oo shakhsi ah, kooxo taageero waalid, iyo kooxo ciyaareed caruurta ah.
- Waxa kale oo uu bixiyaa la-talin shakhsi iyo adeegyo caadi ah oo loogu talagalay caruurta sii waaweyn.

Listen and Talk

(206) 985-6646

iimayl: hear@listentalk.org

rug internet: www.listentalk.org

SEATTLE PARENT INFANT PROGRAM (PIP) (BARNAAMIJKA WAALIDKA IYO ILMAHA EE SEATTLE)

- Waa barnaamij u jiheysan qoyska oo loogu talagalay caruurta min dhalasho ilaa da'da 3 jir, una adeega qoysaska degmooyinka King iyo Snohomish.
- Barnaamijkani waxa uu leeyahay nidaam ah laba luqadood/dhaqan si loo haqabtiro baahiyaha qoys kasta.
- Seattle Parent Infant Program waxa uu sameeyaa booqashooyin, kooxo ciyaareed, kooxo taageero waalid, la-talin iyo fasalo ah American Sign Language.

Parent Infant Program, Hearing Speech and Deafness Center

(206) 323-5770 ama 1-800-222-5036 (cod) / (206) 388-1275 ama 1-800-222-2821 (TTY)

rugta internetka: www.HSDC.org

TACOMA PARENT INFANT PROGRAM (BARNAAMIJKA WAALIDKA IYO ILMAHA EE TACOMA)

- Waxa uu bixiyaa adeegyo iyada oo la isticmaalo isgaadhsiin dhameystiran oo loogu talagalay caruurta min dhalasho ilaa da'da 3 jir iyo qoysaskooda ku nool degmo dugsiyeedka Tacoma School District. Waxa kale oo uu ikhtiyaar u noqon karaa qoysaska ku nool degmada Pierce County.

- Adeegyada waxa ku jira booqashooyin hoy, kooxo ciyaareed, kooxo waalid, iyo kulanno la-talin oo ah isgaadhsiin fool-ka-fool ah.

Parent Infant Program, Birney Elementary School

(253) 571-2060 (Cod/TTY)

WASHINGTON SCHOOL FOR THE DEAF – FAMILY INFANT TODDLER PROGRAM (DUGSIGA DHEGOOLAH EE WASHINGTON – BARNAAMIJKA ILMAHA YAR IYO SOCOD-BARADKA)

- Waa barnaamij u jiheysan qoyska oo loogu talagalay inuu habaqtiro baahiyaha balaadhan ee caruurta, waalidka iyo xubnaha qoyska ee ku nool degmooyinka Clark, Cowlitz iyo Skamania.
- Waxa uu bixiyaa taageero iyo adeegyo loogu talagalay qoysaska oo ah deegaano dabiici ah oo kala duwan. Adeegyada waxa ku jira: fahmida saameynta lumista maqalka, booqashooyin ah hoyga waalidka iyo ilmaha, kooxo taageerid qoys, kooxo ciyaareed muhimadda siiya farsamooyinka luqadda iyo bulshada, soo-bandhiggida noocyo kala duwan oo ah ikhtiyaaro isgaadhsiin, iyo helitaanka moodeelo ku dayasho leh oo ah dad waaweyn iyo ilmaha qayrkiiba.

Washington School for the Deaf

611 Grand Blvd.

Vancouver, WA 98661

(360) 696-6525 (V/TTY) / 800-613-4228 (V/TTY Wicis Bilaash ah)

rugta internetka: <http://www.wsd.wa.gov/>

YAKIMA VALLEY HEARING AND SPEECH CENTER (XARUNTA MAQALKA IYO HADALKA EE YAKIMA VALLEY)

PARENT-INFANT-TODDLER PROGRAM (BARNAAMIJKA WAALIDKA, ILMAHA YAR IYO SOCOD-BARADKA)

- Barnaamijkani waxa uu u adeegaa qoysaska degan xagga sare iyo xagga hoose ee Yakima Valley, aagga Saddexda Magaalo (Tri-Cities), Ellensburg iyo Goldendale.
- La-tacaalis shakhsiyeysan, la-talin, iyo ka-qaybgal waalid ayaa fure u ah guul.
- Waxa ku jira waxbarid ku saabsan luqadda lagu hadlo, luqadda calaamadaha ah, akhriska dibnaha, tababar maqal iyo qalab cod-weynaysiin.

- Waalidku waxay isticmaalaan hab isgaadhsiin oo ay doortaan. Adeegyada waxa lagu bixiyaa luqadda koobaad ee qoyska.
- Waxay si soke ula shaqeeyaa dhakhaatiirka, dugsiyada degmada iyo xirfadleyda kale si loo bixiyo adeegyo joogto ah.

Hearing and Speech Center

303 South 12th Avenue

Yakima, WA 98902

(509) 453-8248

Rugta internetka: <http://hearingandspeechcenter.com/>

Dugsiga Ilmaha Qaba Lumis Maqal

DUGSI DADWEYNE

Haddii ilmahaagu ka weyn yahay da'da 3 sannadood, la xidhiidh dugsiga degmadaada si aad u ogaatid doorashooyinka ay u soo bandhigaan ilmaha qaba lumis maqal. Marka sharciga la eego, ilmo kasta oo qaba lumis maqal iyo baahi adeeg waxa uu xaq u leeyahay adeegyada waxbarashada khaaska ah. Waxa laga yaabaa in ilmahaaga ay u banaan yihiin adeegyada sida la-tacaalista hadalka ama fasal khaas u ah caruurta qaba lumis maqal. Waxa aad la shaqeyn doontaa shaqaalaha dugsiga degmadaada si ilmahaaga loogu soo saaro barnaamij waxbarasho oo shakhsiyeysan (individualized education program) (IEP). Maqal-yaqaankaaga ayaa ku siin kara war dheeraad ah oo kaa gargaari kara sidii aad wax uga sii ogaan lahayd ikhtiyaarada kuu banaan iyo adeegyada kale.

DUGSI DEGANAANSHO LEH

Washington School for the Deaf (WSD) (Dugsiga Dhegoolaha ee Washington) waa dugsiga gobol oo deganaansho leh, oo ku yaalaa Vancouver, WA. WSD waxa uu waxbarasho siiyaa ardayda ku jira dugsiga barbaradka ilaa dugsiga sare. Ardayda dhigata WSD waxay ku nool yihiin isla goobta dugsiga.

WASHINGTON SCHOOL FOR THE DEAF

611 Grand Blvd.

Vancouver, WA 98661

(360) 696-6525 (cod) / (360) 418-4366 (TTY)

rugta internetka: <http://www.wsd.wa.gov/>

Dugsiyada Gaarka ah

LISTEN AND TALK

(barnaamijyo loogu talagalay caruurta jira 3 ilaa 5 sannadood)

8610 8th Avenue NE

Seattle, WA 98115

(206) 985-6646

iimayl: hear@listentalk.org

rugta internetka: www.listentalk.org

NORTHWEST SCHOOL FOR HEARING IMPAIRED CHILDREN (DUGSIGA WAQOYI-GALBEED EE CARUURTA KA DHIBAATEYSAN MAQALKA)

(barnaamijyo loogu talagalay caruurta jira 3 ilaa dugsiya dhexe)

P.O. Box 31325

Seattle, WA 98103

(206) 364-4605

rugta internetka: <http://northwestschool.com/>

SPOKANE HOPE SCHOOL (HEARING ORAL PROGRAM OF EXCELLENCE) (BARNAAMIJKA MAQALKA IYO HADALKA EE WACAN)

(barnaamijyo loogu talagalay caruurta min dhalasho ilaa 5 jir)

University Hearing & Speech Clinic

310 N. Riverpoint Blvd, Box V.

Spokane, WA 99202-1675

(509) 368-6899

rugta internetka: <http://www.oraldeafed.org/schools/hope/index.html>

Rugaha Internetka

Rugahan internetka ee soo socda waa kuwo illo fiican u ah qoyskaaga. Liiskan waxa ku qoran kaliya tiro yar oo ah rugaha internetka ee jira. Waxa aad heli doontaa rugo internet oo kale marka aad baadhid Internetka.

Haddii aanad Internetka ka gali karin gurigaaga, weydiiso laybareeriga degmadaada. Laybareeriyada intooda badani waxay imminka bixiyaan galitaan Internet oo bilaash ah iyo tababar ku saabsan sida loo isticmaalo kombiyuutar.

OGOW: Rug internet ama adeeg tirada lagu soo daray iyada oo la adeegsanayo bar gudbin internetka ah macnaheedu ma aha in rugtaa internetka ama adeeggu aqbalaad ka haysto Barnaamijka Garashada Hore ee Lumis Maqal, Cilad-sheegidda iyo Wax-ka-qabashada (Early Hearing Loss Detection, Diagnosis and Intervention Program) ee Wasaaradda Caafimaadka ee Washington (Washington State Department of Health). Raadso talada dhakhtarka ilmahaaga ka hor inta aanad talaabo qaadin ama aanad isku halayn war ka yimi illahaas ama adeegyadaas.

BABYHEARING.ORG

<http://babyhearing.org/>

Babyhearing.org waxa soo saaray koox ah xirfadley oo ka kooban maqal-yaqaano, Cilad-yaqaano hadal-luqad, macallimiinta dhegoolaha, hidde-yaqaano, dhakhaatiir iyo waalidka ilmo dhegoole ah ama dhego culus oo ku xidhiidhsan Boys Town National Research Hospital ee Gobolka Nebraska. Waxa ku yaala war badan oo ku saabsan baadhitaanka maqalka dhawaan-dhaladka iyo lumista maqalka ee ilmaha yaryar.

INFANT TODDLER EARLY INTERVENTION PROGRAM (ITEIP) (BARNAAMIJKA WAX-KA-QABASHADA GOOR HORE EE ILMAHA YAR IYO SOCOD-BARADKA)

<http://www1.dshs.wa.gov/iteip/>

Infant Toddler Early Intervention Program (ITEIP) waxa uu bixiyaa adeegyo wax-ka-qabasho goor hore, oo ay ku jirto Isu-duwidda Adeegyada Qoyska (Family Resources Coordination), oo loogu talagalay caruurta min dhalasho ilaa da'da 3 jir iyo qoysaskooda. ITEIP, oo ka tirsan Wasaaradda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services) (DSHS), Qaybta Adeegyada Naafada Korniiinka (Division of Developmental Disabilities) (DDD),

waxay gudaha Gobolka Washington ka hirgalisaa Xeerka Waxbarashada Dadka Qaba Naafada (Individuals with Disabilities Education Act (IDEA), Part C).

WASHINGTON SENSORY DISABILITIES SERVICES (WSDS) (ADEEGYADA NAAFADA DAREENKA EE WASHINGTON)

<http://www.wsdsonline.org/>

Washington Sensory Disabilities Services waa mashruuc uu maalgaliyo xafiiska gobolka ee loo yaqaano OSPI (Office of the Superintendent of Public Instruction) (Xafiiska Kormeeraha Waxbarashada Dadweynaha) waxana uu gobolka oo dhan ka bixiyaa war, tababar, gargaar farsamo, iyo adeegyo uu siiyo qoysaska iyo bareyaasha kuna saabsan caruurta iyo dhallinta leh naafada ah dareemayaasha – ardayda ah dhegoole/dhego culus, indho-la’/aragga ka dhibaateysan, ama ah dhegoole-indhoole.

OFFICE OF THE DEAF AND HARD OF HEARING (ODHH) (XAFIISKA DHEGO-LA’AANTA IYO DHEGO CUSLAANTA)

<http://www1.dshs.wa.gov/hrsa/odhh/>

ODHH waxa uu adeegyo siiyaa dadka dhego la’, dhego culus iyo kuwo ah dhegoole-indhoole dhamaan Gobolka Washington. Xarumaha Adeeg Gobol ee ODHH waxa jooga shaqaale xirfadle ah oo la shaqeeya caruurta iyo qoysaskooda si loo haqabtiro baahiyahooda luqadeed, farsamo iyo isgaadhsiin kale. Xarumahaasi waxa kale oo ay bixiyaan adeegyo ah maamulis kiis, u-doodis, adeegyo war iyo gudbin, waxbarasho iyo tababar, iyo gargaar-gaadhsiin ay siiyaan macaamiisha iyo qoysaskooda.

AMERICAN SPEECH-LANGUAGE-HEARING ASSOCIATION (ASHA) (ISBAHAYSIGA HADALKA-LUQADKA-MAQALKA EE MARAYKANKA)

<http://www.asha.org/default.htm>

ASHA waa isbahaysi xirfadle, saynis iyo ictiraaf-bixin oo ay ku jiraan **xubno iyo shuraako ka badan 114, 00** kuwaasoo ah cilad-yaqaanno hadal, maqal-yaqaanno, saynis-yahanno hadal, luqad, iyo maqal oo jooga gudaha Maraykanka iyo dibadda. Hadafka ASHA waa in la hirgaliyo danaha xirfadleyda iyo in la bixiyo adeegyo leh tayada ugu sareysa xagga aqoonta maqalka, cilad-sheegidda hadalka-luqadda, iyo sayniska hadalka iyo maqalka, iyo in loo doodo dadka qaba naafooyiin isgaadhsiin.

HANDS & VOICES

<http://handsandvoices.org/>

Hands & Voices waa hay'ad faa'iido-ma-doon ah oo ay hawlgaliyeen waalid oo taageero aan kala-sooc lahayn siisa qoysaska leh caruur dhegoole ah ama dhego culus. Waxay bixiyaan hawlo taageero iyo war ku saabsan arrimaha dhego-la'aanta iyo dhego-cuslaanta oo ay siiyaan waalidka iyo xirfadleyda waxana ku jira kara munaasabado gargaar-gaadhsiin, siminaaro, u-doodis, hawlo u-doodis, wada-xidhiidh waalid-ka-waalid ah, iyo wargeys. Hands & Voices waxay ku dedaashaa inay qoysaska ku xidho adeegyo iyo war si ay u gaadhaan go'aamo ka-warqabis leh oo ku saabsan arrimaha dhego-la'aanta ama lumis maqal.

BEGINNINGS FOR PARENTS OF CHILDREN WHO ARE DEAF OR HARD OF HEARING (BILAWGA WAALIDKA CARUURTA DHEGO LA' AMA DHEGO CULUS)

<http://www.ncbegin.org>

BEGINNINGS waxa loo aasaasay si qoysaska leh caruur dhego la' ama dhego culus ee ah da'da dhalasho ilaa 21 jir loo siiyo taageero niyadeed iyo helitaanka war. Hadafka BEGINNINGS waa in waalidka laga gargaaro sidii ay u noqon lahaayeen kuwo warqaba, oo awood iyo taageero hela marka ay gaadhayaan go'aamo ku saabsan caruurtooda.

ALEXANDER GRAHAM BELL ASSOCIATION FOR THE DEAF AND HARD OF HEARING (AG BELL) (ISBAHAYSIGA ALEXANDER GRAHAM BELL EE DHEGOOLAHA IYO DHEGO CUSLAHA)

<http://www.agbell.org/>

Alexander Graham Bell Association for the Deaf and Hard of Hearing (AG Bell) waa adeeg ah nolosha oo dhan, shabakad taageero, iyo u-doodista dhegaysiga, waxbarashada, hadlidda iyo nolol xornimo leh oo ay helaan dadka qaba lumis maqal. Iyada oo la isticmaalayo qoraallo, gargaar-gaadhsiin, tababar, deeq waxbarasho iyo gargaar dhaqaale, waxay, AG Bell hormarisaa isticmaalka luqadda lagu hadlo iyo farsamada maqalka. Iyada oo xarunteedu tahay Washington, DC, ayna laamo ku leedahay Maraykanka iyo Kanada, iyo shabakad shuraako oo ah heer caalami, ayaa jiritaankeeda heer caalami uu AG u saamaxayaa inay xubnaheeda iyo dadweynaha taageerada ay u baahan yihiin ku siiyo meel u dhow gurigooda. Iyada oo leh adeeg jiray in ka badan hal qarni, waxay AG Bell taageertaa hadafkeeda ah: Xornimo oo la Hormariyo iyada oo la adeegsanayo Dhegaysi iyo Hadlid.

PARENT TO PARENT (WAALID KA WAALID)

http://www.arcwa.org/parent_to_parent.htm

Waa shabakad taageero oo loogu talagalay caruurta qaba naafo. Adeegyada la bixiyo waxa ku jira isu-duweyaal degmo, taageero niyadeed oo la siiyo waalidka qaba caruur leh naafo, bandhigyo loo soo jeediyo kooxo waalid, xirfadleyda, iyo ururada kale, iyo war ku saabsan naafooyinka, adeegyada beesha ee ilmaha iyo qoyska, kulanno taageero waalid, tababar loogu talagalay waalidka raba inay noqdaan tabaruce gargaarid waalid.

NATIONAL CENTER FOR HEARING ASSESSMENT & MANAGEMENT (NCHAM) (XARUNTA QARAN EE QIIMEYNTA MAQALKA & MAAMULISTA)

<http://www.infanthearing.org>

Sannadkii 1995, National Center for Hearing Assessment and Management (NCHAM) ayaa laga aasaasay jaamacadda Utah State University. NCHAM waxay taageertaa barnaamijyada cisbitaalka ku saleysan ee Baadhitaanka Guud ee Maqalka Dhawaan-dhaladka (Universal Newborn Hearing Screening) iyo barnaamijka gobolka ku saleysan ee Garashada iyo Wax-ka-qabadka Goor Hore ee Maqalka (Early Hearing Detection and Intervention) (EHDI) kaasoo ka tirsan dedaalkooda lagu sugayo in dhamaan caruurta laga baadho lumis maqal wakhtiga dhalashada, iyo in ilmaha laga soo gudbiyo baadhitaanka ay wakhti fiican ku helaan adeegyo haboon oo ah cilad-baadhis iyo wax-ka-qabasho. Waxay maalgalin ka heshaa federalka, gobolka, iyo illo gaar ah si loo sameeyo cilmi-baadhis, loo soo saaro alaab tababar, loo bixiyo tababar iyo gargaar farsamo, loo bixiyo war ku saabsan garasho ah goor hore iyo maamulista lumista maqalka. Rugtooda internetka waxa ku jira war badan oo ku saabsan baadhitaanka maqalka dhawaan-dhaladka iyo la-sii-socod. Waxa kale oo ku jira ogeysiisyo, iyo tiro-koob iyo war la-xidhiidhis oo ah gobol kasta.

NATIONAL ASSOCIATION OF THE DEAF (NAD) (ISBAHAYSIGA QARAN EE DHEGOOLAHA)

<http://www.nad.org>

Hadafka National Association of the Deaf (Isbahaygia Qaran ee Dhegoolaha) waa in la hormariyo, la ilaaliyo, oo la dhawro xuquuqda iyo tayada nolosha dadka dhego la' ama dhego culus ee ku nool Maraykanka. Rugtan internetka waxay bixisaa war ku saabsan xuquuqda sharci, arrimaha u-doodista, su'aalaha inta badan al isweydiyo, war iyo gargaar-gaadhsiin.

AMERICAN ACADEMY OF PEDIATRICS (AAP) (AKADHAMIYADA MARAYKANKA EE DAWEYNATA CARUURTA)

<http://www.aap.org/>

AAP waa urur ka kooban 60, 000 oo ah dhakhaatiir caruur oo u guntaday in dhamaan ilmaha yaryar, caruurta, tobaneeyo-jirka iyo dhallinta la gaadhsiiyo wacnaanta caafimaad ee ugu fiican xagga jidhka, maskaxda, iyo bulshada. Rugta internetka ee AAP waxay bixisaa war guud oo loogu talagalay waalidka caruurta min dhalasho ilaa da'da 21 jir. Rugtan internetka waxa ku jira war ku saabsan barnaamijyada badan ee Akadhamiyada iyo hawlahooda, cadeynta siyaasaddooda iyo tilmaan-bixinta dhaqankooda, qoraallo iyo illo caafimaad ilmo oo kale.

WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF HEALTH (WASAARADDA CAAFIMAADKA EE GOBOLKA WASHINGTON)

<http://www.doh.wa.gov/ehddi>

Barnaamijka Garashada Lumista Maqalka, Cilad-sheegidda iyo Wax-ka-qabashada Goor Hore (Early Hearing Loss Detection, Diagnosis and Intervention) (EHDDI) waxa uu degan yahay Qaybta Adeegyada Hiddaha (Genetic Services Section) ee Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington (Washington State Department of Health). Barnaamijka waxa lagu maalgaliyay laba heshiis iskaashi oo lala yeeshay Xarumaha Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurka (Center for Disease Control and Prevention) (CDC) iyo Maamulka Shaqaalaha iyo Adeegyada (Human Resources and Services Administration) (HRSA), iyo waliba lacag maalgalin guud oo gobolka ah. Hadafyada ugu muhiimsan ee barnaamijka EHDDI waa in la sugo in dhamaan ilmaha yaryar ee ku dhashay gobolka Washington laga baadho lumis maqal ka hor ka-bixista cisbitaalka ama marka ay jiraan da'da hal bil, inay helaan qiimeyn maqal oo cilad-sheegis ah marka ay jiraan saddex bilood haddii loo baahdo, iyo in la qoro adeegyada wax-ka-qabashada goor hore marka ay jiraan da'da lix bilood ama ka hor, haddii la ogaado in ilmuhu qabo lumis maqal.

CHILDREN'S HOSPITAL & REGIONAL MEDICAL CENTER (CISBITAALKA CARUURTA IYO XARUNTA CAAFIMAADKA EE GOBOLKA)

<http://www.newborn-hearing-screening.org>

Cisbitaalka Children's Hospital & Regional Medical Center waxa uu si iskaashi ah ula shaqeeyaa Northwest Lions Foundation for Sight & Hearing (Samafalka Aragga & Maqalka ee Northwest Lions), Washington State Department of Health (Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington), iyo Laanta Washington ee American Academy of Pediatrics

(Akadhamiyada Daweynta Caruurta ee Maraykanka) si loo hirgaliyo Barnaamijyada Baadhitaanka Guud ee Maqalka Dhawaan-dhalaadka (Universal Newborn Hearing Screening Programs) oo ku xidhan daryeel la-sii-socod oo haboon dhamaan gudaha Washington.

NORTHWEST LIONS FOUNDATION FOR SIGHT & HEARING (SAMAFALKA ARAGGA & MAQALKA EE NORTHWEST LIONS)

<http://www.nlfoundation.org/hearing/index.cfm>

Northwest Lions Foundation for Sight & Hearing waxa uu leeyahay lix barnaamij oo kala duwan oo loo hirgaliyo hadafkeeda ah ilaalinta iyo soo-celinta maqalka. Barnaamijyadaa waxa ku jira: Lions Affordable Hearing Aid (Gargaarka Maqalka ee la Goyn Karo), Lions Hearing Aid Bank (Gargaar Bangi), Lions Early Assessment Program (LEAP) (Barnaamijka Qiimeynta Goor Hore), Lions Health Screening Unit (Qaybta Baadhitaanka Caafimaadka), Lions Patient Care Program (Barnaamijka Daryeelka Bukaanka) iyo Lions Special Project Grants (Mashruuca Deeqda Gaarka ah).

Maqal-yaqaanada (Audiologists) Qiimeeya ee Daryeela Ilmaha Yaryar iyo Caruurta Qaba Lumis Maqal

Tilmaan-bixiyaha Adeegyada Maqal-yaqaanka Caruurta

Xarumahani waxay sheegeen inay ka soo baxayaan shuruudaha Nidaamka Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington ee ku Saabsan Qiimeynta Cilad-sheegidda ah ee Ilmaha Yaryar ee Laga Soo Gudbiyay Barnaamijyada Baadhitaanka Guud ee Maqalka Dhawaan-dhaladka (Washington State Department of Health Protocol for Diagnostic Audiological Assessment of Infants Referred from Universal Newborn Hearing Screening (UNHS) Programs).

Western Washington

Audiology Clinic
505 NE 87th Ave, Suite 150
Vancouver, WA 98664
Phone: 360-892-9367
Fax: 360-253-3801

Children's Hospital & Regional
Medical Center
PO Box 5371, MS W-6640,
Audiology
Seattle, WA 98105
Phone: 206-987-5173
Fax: 206-987-3121

Children's Bellevue, Audiology
1135—116th Ave., Suite 400
Bellevue, WA 98004
Phone: 425-454-4644
Fax: 425-451-0214

Evergreen Speech & Hearing
Services
1800—116th Ave., Suite 103
Bellevue, WA 98683
Phone: 425-454-1883
Fax: 425-454-2036

Evergreen Speech & Hearing
Clinic
12333 NE 130th Lane, #430
Kirkland, WA 98034
Phone: 425-899-5050
Fax: 425-899-5054

Madigan Army Medical Center
Audiology Clinic
*serves military families only
MCHJ SET-A
Tacoma, WA 98431
Phone: 253-968-0927
Fax: 253-968-5927

Mary Bridge Speech & Hearing
Services
Mary Bridge Children's Hospital
1220 Division
Tacoma, WA 98403-1321
Phone: 253-403-4437
Fax: 253-627-5004

University of Washington
Pediatric Audiology Clinic
Center for Human Development &
Disability (CHDD)
PO Box 357920
Seattle, WA 98195
Phone: 206-598-9347
Fax: 206-598-7815

Virginia Mason Medical Center
Audiology
1100 Ninth Avenue
PO Box 900
Seattle, WA 98111
Phone: 206-223-8802
Fax: 206-223-2388

Western Washington University
Speech & Hearing Clinic
516 High Street, MS 9078
Bellingham, WA 98225-3881
Phone: 360-650-3881
or 360-650-3198
Fax: 360-650-2843

Eastern Washington

Columbia Hearing & Balance Ctr
1149 N Edison, Ste. D
Kennewick, WA 99336
Phone: 509-736-4005
Fax: 509-737-9525

Hearing & Speech Center
303 South 12th Ave.
Yakima, WA 98902
Phone: 509-453-8248
Fax: 509-248-9012

Holy Family Hospital
Speech & Hearing Center
5628 N Division, Suite D1
Spokane, WA 99208
Phone: 509-482-2193
Fax: 509-482-2196

Horan Hearing & Balance Center
423 W Third Ave, Ste A
Moses Lake, WA 98837
Phone: 509-764-8642
Fax: 509-764-8644

Spokane Audiology Clinic
Deaconess Medical Office Building
801 W 5th, Suite 112
Spokane, WA 99204
Phone: 509-835-5111
Fax: 509-835-5222

Spokane Ear, Nose & Throat Clinic
217 W Cataldo
Spokane, WA 99201
Phone: 509-624-2326
Fax: 509-789-5705

Spokane Valley Ear, Nose, &
Throat, P.S.
Valley Medical Center
1414 N Houk Road, Suite 208
Spokane, WA 99216
Phone: 509-928-7272
Fax: 509-928-7346

University Hearing & Speech Clinic
University Programs in Communi-
cation Disorders
Health Sciences Building
310 N Riverpoint Blvd
Spokane, WA 99202
Phone: 509-358-7587
Fax: 509-368-6890

Walla Walla Clinic
320 Willow
Walla Walla, WA 99362
Phone: 509-525-3720
Fax: 509-529-9939

Oregon

Legacy Audiology Services
1040 NW 22nd Ave, #460
Portland, OR 97210
Phone: 503-413-8154
Fax: 503-413-6944

Liiskan waxa loo bixiyay fududeyn kaliya waxana laga diyaaray iskaashi lala yeeshay Children's Hospital & Regional Medical Center. Wasaaradda Caafimaadku uma taliso xirfadleyda liiskan ku jira mana sameyn karto ballanqaad ku saabsan tayada daryeelka.

Revised 11/2007